MAXAA NALOO CADAABAYAA?

W.Q: QAASIM XIRSI FAARAX

(DUULLAAN JECEL)



Somali Library

Buugaan iyo Buugaag kale ee ku qoran Luqadaada Hooyo ee Af-Soomaaliga waxaad ka heleysaa Somali Library

Fadlan Booqo Boga Telegram-ka

https://t.me/Somalilibrary

liibaanwaasuge

Telegram @Somalilibrary

DAABACADDII KOOWAAD.

WAXAA LA DAABACAY DEC: 1995 KII.

XUQUUQDIISA OO DHAMI WAXA

AY U XAJISAN TAHAY QORAAGA:

QAASIM X. FARAX

MAXAA NALOO CADAABAYAA?

W.Q;

QAASIM XIRSI FAARAX

(DUULLAAN JECEL).

GOGOL DHIG

Eebbe weynaa mahadsan, Adeegihiisayna nabad gelyo iyo naxariis korkiisa ahaatay, *rumeeyeyaalkaana u ducayn mudan. Eebbe ha na waafajiyo samafalka iyo dan u adeegga hana nagu abaal mariyo shuquladeenna wan wanaagsan ee isaga u barax la', inta habawsanna Allaha hanuuniyo. Qabiil qaran ma noqdaa? qaranse qolo qolo ma u qaybsamaa? qabiilse qaarad ma noqdaa?. Weydiimahani waxa ay u baahan yihiin jawaabo sugan, ka dib marka ay jawaabtooda helaanna waxa ay u baahan yihiin ku hawl gal iyo meel marin wixii ka soo baxa.*

Waxaan uhibeeyey;

ugu horeynta Hooyaday, Salaado Aadan Wehliye iyo Aabahay Xirsi Farax Duullaan jecel. Marka labaadna guud ahaanba dadkii soomaaliyeed ee ku basan baasay dagaalkii sokeeye, iyaga oo dambilaaweyaal ahaa.

HORUDHAC

Buuggan waxaa loogu tala galay in uu wax ka taro ol-olayaasha loo tafa xaytay ee loogu jiro sidii dib loogu soo noolay lahaa qarankii Soomaaliyeed ee dhintay, kaas oo dhawr sano mootan ayna weli qabrigiisii ku hardamayaan dhurwaayo hilibkiisii feen feenanaya, kuwaas oo raqda ay dul joogaan ku mintidsan oo nafta dul dhigaya.

Haddaba buuggani waa mid xambaarsan yahay macluumaad fara badan oo jacbur ah kuna wada salaysan hab tusaalayn iyo tilmaan tusid ah. Waxaase ka weyn oo uu xambaarsan yahay waanooyin iyo caqli celinno fara badan oo loo cuskaday kitaabka Ilaahay iyo ku dayashada sugnaaday ee Nebigiisii

NNKHA. Sidaa oo kale loola noqday taariikho iyo dhacdooyin lagu waana qaadan karo, iyo cilmiyo sugan oo la soo dhiraandhiriyey.

Buuggaan waxaa la rajaynayaa in uu u gogol xaaro midnimo iyo jiritaan dambe oo Soomaaliyeed, taas oo loo maleeyo in qof kaste oo ka mid ah qabiilka laf gaabka ah ee Soomaaliya marka uu akhristo uu guntiga dhiisha isaga dhigi doono sidii uu u abuuri lahaa qoyska Soomaaliyeed oo mid ah.

Waxaana la rajaynayaa in macluumaadka isku dhafan ee laga helayo buugga ay ku abuuraan akhristaha qalbi xaarnaan, daba gal, cilmi baaris, xog doon, munaaqasho ama dood, saraaxo ama ku dhiiranaan caddaysasho waxa qalbiga ku jira ee umal iyo ciil iyo murugo ah.

Ka dib marka akhristaha taas laga helana waxaa la arkaa in ay usoo baxdo baadi goob nolol cusub, tiiyoo uu ka baqoolayo gurigii qabiileed ee uu taagnaa kuna harbaajinayo hooy kaste oo reerka Soomaaliyeed leeyahay. Haddaba taasi waxa ay horseedi kartaa dhabta iyo xaqiiqada oo dhaqso loo helo, boogaha oo la dhayo lana daweeyo, xorriyada qof ahaaneed ee af iyo addinba leh oo la garto, in la kala saaro san iyo xun.

Waxaa kale oo ay tani qayb libaax ka qaadan kartaa dhiiri gelinta dhalinta iyo aqoonyahanada Soomaaliyeed ee afkii juqda gabay, kuwaas oo la arko in uu mid walbaa soo bandhigo uurkutaalladii uu la taahayey iyo cuqdadihii dahsoonaa, iyada oo taasi ay isla markaas dabar goonayso dawrkii isla qumanaanta

iyo dhan isu buufinta ayna furayso is barasho furan, uguna baaqayso kuwa indhaha kala qaaday baraarug ah in la gaaray gurigii xaqiiqada, loona baahan yahay in ay ka muujiyaan dawrkooda.

Guud ahaan buuggani waxa uu ka kooban yahay Sagaal cutub oo cutubkiiba uu ka sii kooban yahay Sideed cinwaan cel celis ahaan. (Shan ilaa Laba iyo toban cinwaan).

Cutubka koowaad waxa ka waramayaa sida ay aadanuhu u fasahaadshaan arlada Alle, wuxuuna ku tusinayaa waddooyinka ay dadkeenu u qaadeen fasahaadka oo keenay in eebe u caroodo, ka dibna uu ciqaab huwiyo.

Cutubka Labaadna waxa uu xoogga saarayaa waxa ay tahay qabyaaladdu iyo xumaha ay bulshada iyo shakhsi intaba ku reebto, wuxuuna cutubku kuu taabanayaa ilaha fidno ee ay ka dhalato isaga oo isla markaana kuu tilmaamaya surinada looga baxsan karo oo hongoreheeda looga badbaadi karo. Waxaas oo dhanna waxa lagu eegayaa u hogaansamidda kitaabka Eebbe iyo ku dayashada suubanahiisa NNKHA.

Cutubka Saddexaad isagu waxa uu awooddiisa isugu geeynayaa sidii uu kuu dareensiin lahaa ciqaabka Eebbe isaga oo ku tusinaya waxyaalaha sababa, siyaabaha uu u dhaco, dadka uu ku dhaco, iyo siyaabaha looga bad baado oo isugu jira habkii looga dawoobi lahaa iyo habkii laaga hor tagi lahaa intaba. Waxaadna halkaa ka akhrin kartaa waxyaalo fara badan oo ah dhacdooyin lagu waana qaadan karo.

Cutubka Afraad isaga oo sii ayidaya kuwii ka sii horeeyey ayuu kuu koobayaa dhawr dersin oo ah Aayadaha qur'aanka ee lagu cibra qaadan karo, kuwaas oo kaaga digaya xumaanaha lagu kasbadao ciqaabka Eebbe, wuxuuna isugu soo kaa aruuriyey macnihii iyo lafdigii Aayadahaas oo qubane ah.

MAXAA NALOO CADAABAYAA?

W. Q: QAASIM HERSI FARAH

(Duullaan jecel)

Daabacddii Koowaad, Malaysia, 1996 kii

Dhammaanba Xuquuqda kitaabkani waxa ay u xajisan tahay Qoraaga;

Qaasim X. Farah.

Telegram @Somalilibrary

Cutubka koowaad.

HORTA YAA DUNIDA FASAHAADIYA

DADKAA DUNIDA FASAHAADIYA

Iyadoo wax waliba ay ku dhacaan qadarka iyo doonista Allaha awoodda sare leh, ayey hadana wax waliba leeyihiin sabab ay eersadaan taas oo loo aaneeyo inay ka dambaysay fal dhacaas , iyadoo isla markaasna xambaarsanaysa eedda iyo canaanta wax alla iyo wixii hoog iyo khasaare ka dhasha dhacdadaas.

Sidaas si la mid ahna dusha u ridanaysa, oo iyadu ku dheefsanaysa wixii ay ammaan iyo wanaag ka dhasha ee ay keento faa'iidada ka timaada dhacdadaasi ama natiijada ka askunta ficil hawleedkaas ay qolo ku kacayso.

Haddaba anaga oo hadalka taas ka amba qaadayna ayaan is weydiinaynaa;

Maxaa dabada isugu wada xiray dunidan wada damaadsan? waa maxay waddamada ama qowmiyadaha iyagu nasiibka u helay hadimada hoog ee is daba joogga ah ee markay mid ka baxaanba mid kale ku hantaaturoonaya ee lugta dalaq siisanaya ?

Waa biyo dhaca sheekada ee dadkeenan Soomaaliyeed ayaan darra badanaa? maxay ugu

badsadaan dhibka dunida inteeda kale? maxaan galabsannay oo nalaka gudayaa? hadayba dhacdayse eed aan galnay maxay u dami la'dahay aar gudista nala ku hayaa? maxay tahay ujeeddada weyn ee ka dambaysa dhacdooyinkan naxdineed? Allow yaa ogaada godobta aan galnay weynaa oo wax yeello badanaa?.

Runtii kuwani waa su'aalo ay isweydiintoodu mudan tahay, ka jawaabiddooduna ayba lagama maarmaan tahay, balse waxaa loo baahan yahay in jawaabohooda loo daayo cidda mudan ee ku habooon inay ka jawaabto, ciddaas oo noqon karta uun inta loo xulay. isla markaasna laga faa'iidaysto oo la qaato jawaabohooda cilmiga ku salaysan.

Maxaa yeelay marba haddii mas'alo lagu murmo oo lagu maskax wareero, la is ma waalo ee miyirka ayaa la isgeliyaa oo loo bandhigaa mawlaha na maamula, meerisyada kitaabkiisa qiimaha leh ayaana markaas laga helayaa jawaabihii oo waafi ah, sidaas darteed aniga iyo adiguba maan garan karno meel ka haboon ee laga heli karo jawaabaha su'aalahakan, dhanka kale hadaan ka eegno kitaabkaas Qur'aanku waa midka keliya ee laga helayo xalka wax kaste iyo akhbaarta wax kaste.

Haddaba kitaabkaas isaga ah oo nooga jawaabaya su'aalahaan xusnay ayaa jawaabta koowaad ee aan buuggaba cinwaanka uga dhignay na siinaya oo leh;DADKAA DUNIDABA FASAHAADIYA. Ilaah wuxuu yiri;

ظهر الفساد في البر والبحر بما كسبت أيدي الناس ليذيقهم بعض الذي عملوا لعلهم يرجعون (الروم:41) .

(Xumaan baa ka soo if baxday bad iyo berriba waxay kasbatay gacmo dad darteed, si Eebe u dhadhansiiyo wax ka mid ah fal-fal xumooyinkay sameeyeen, waa intaas ooy ka soo noqdaane.) Ar-Ruum;14.

Ilaah waxa kale oo uu inoo caddeeyey in ay Aadanuhu sidaa si la mid ah islaaxiyaan dunida oo ay ka dhaliyaan wanaag iyo samo, hadana sidoo kale Ilaah wuuxuu inoo caddeeyey in wanaajinta iyo hoojinta uu marba mid uun qolo ama qof ku dhufanayo oo dusha ka huwinayo iyada oo ay ku xiran tahay hadba sida ay qoladaasi u shaqaysato samo ama xumo.

Sida hadday qolo ka leexdaan kheyr iyo samo ay fali jireen, fara geliyaanna shar iyo xumaan sida dhacaysa maanta oo kale, Allaha wax walba awoode ahna wuxuu ku sii jiidayaa hoog iyo ba' isaga oo kaga jawaabaya fal-fal xumadoodii oo dhadhansiinaya kharaarka ay leedahay shartu, si ay u dareemaan dhibka oo ay uga soo noqdaan intay wax gartaan, si taa la mid ah qoladii ka tagta xumi ay ku hawllanaayeen kuna beddesha samafal iyo wanaag. Ilaah wuxuu u sii horseedayaa barwaaqo iyo baraare waafaqsan abaal marintooda, wuxuuna yiri;

(إن الله لايغيرمابقوم حتي يغيروا ما بانفسهم). الرعد:11

(Ilaahayna ma dooriyo waxa uu dad ku sugan yahay inta ay ka doorinayaan waxa naftooda ku sugan) Ar-racd;11.

Waxayna tani waafaqsan tahay macnaha dhabta ah ee loola jeedo maah maahda soomaaliyeed ee ah; caada la gooyaa cara Allay leedahay, taas oo macneheeda loo dan leeyahay uu yahay yaan la goyn caadada wanaagsane ilaah ka raalliga yahay. waana waxyaalahaas waxyaalaha aan ku garan karno in dadku iyagu ay yihiin kuwa dunida ku keena sababta fasahaadka ama sababta barwaaqda iyo baraarahaba, hadaba musiibada adduunka dadku iyagaa u macallin ah, musiibaduna adduunyada iyadaa u macallin ah.

DANAANADA?

Waa maxay danaanadu (qabyaalad)?

danaanadu waa qofka ama qolada oo ku tacasubta (u danaanaysa iyadoo ku yoto'san) wax, qof, qolo, midab, dariiqo, urur, macallin, magac iwm, tiiyoo uu ugu hiillinayo oo ku raacayo gar iyo gardaraba, kuna faanayo isaga oo aaminsan in ay taasi tahay tan ugu fiican ee jirta IWM.

Maxaa ka mid ah waxyaalaha badanaaba lagu qabyaaladaysto ama la isugu danaaneeyo? waxaa ka mid ah; sinji dhalasho ama sheegasho, midab, dhaqan, caado, diin, mad-hab, fikrad, sheekh/macallin, naftaada IWM.

Oo yaa soo allifay qabyaaladdan baas? waxaa soo allifay ugu horayntii Ibliis/sheydaan. oo goormuu soo allifay? wuxuu soo allifay markuu ilaah ku amray inuu u sujuudo Aadam, markaas oo ay niyaddiisa gashay ma adiga oo qaraami ah oo Ibliis ah baad maanta u sujuuddaa Aadam oo dhoobo iwm laga sameeyey? qoodhay iyo xeraday waa qaran dhac buu is yiri; waana kan ka joogsaday sujuuddii oo markuu Ilaah ku yiri;

War maxaa kugu dhacay ee aad ugu sujuudi weyday, wuxuu ugu jawaabay si furfur caddi ah;

(قال أنا خير منه خلقتني من نار وخلقته من طين) ص:76.

(wuxuuna yiri anaa ka kheyr badan isaga (Aadam), waxaad iga abuurtay Naar isagana waxaad ka abuurtay dhoobo) Saad;76.

Bal dhoobo iyo naar iyamaa fiican? sidaas oo kale ayaa qofka qabyaaladdu dardertay ugu faanaa wax aan qiimo lahayn ama kaba xun waxa uu ka faanayo.

Mar kalena waa tan Ilaah noogu sheegayo;

(الآسراء(قال اأ سجد لمن خلقت طينا ؟:61.

(oo ma waxaan u sujuudaa wax aad abuurtay isagoo dhoobo ah)? Al-isra'; 61.

Waxaa iyana habboon in la is weydiiyo ruuxa ku galaya ruux kale in uu ka dhashay reer habel darteed maxay tahay ujeeddadiisu? runtii waxa keliya ee taa la oran karo waxay tahay in ruuxaasi uu yahay mid Ilaahay la dagaallamaya oo dacwad ugu haysta maxaad u abuurtay reer hebel? maxaa wacay ruuxna ma uusan dooran isagu in uu ka dhasho reer hebel,

sidoo kale looma sheegin markii uu dhashay xumaan ay reer hebel leeyihiin si uu uga baxo, lamana tusin reer hebel kale oo ka wanaagsan si uu ugu biiro.

Waxaaba taas ka sii daran in aan laga aqbalayn haddii uu soo codsado in uu inta ka baxo reer hebel u beddesho reer hebel oo cid rukhsaysa iska daaye cid boos-hayn siinaysa ayaanba jirin. sidaa darteed kan ugu aabyoonahaya qof maxaad reer hebel uga dhalatay waxay eeddiisu u noqon kartaa abuurihii kan uu haysto illeen shaqadiisuu ka dood qabaaye.Haddaan intaas uga gudubno macnaha iyo qeexida Qabyaaladda bal aan haatan u soo dhaadhacno cinwaanka qoraalkeenan.

Haddaan faahfaahin dheeri ah ka sii bixinno macnaha danaanada (tacasubka ama qabyaaladda), in

badan baa laga hadlay waxaana lagu caddeeyey tilmaamo iyo dabeecado fara badan oo kulligood isugu wada imaanaya ba' iyo balaanbal, waxaa ka mid ah culimada wax ka sheegtay caalimka ama faylasoofka weyn ee reer Yemen, Ibnu Khalduun, noolaana 1332 M =732, kaas oo ka yiri qabyaaladda sidatan:

Waxyaalaha ku liqdaaran oo lagu saliday barwaaqada iyo horumarka waxaa ugu weyn qabyaaladda, qabyaaladdu, waxay u gaar tahay oo lagu yaqaan reer baadiyaha, maxaa yeelay waxa ay iyagu weli ku noolyihiin nolosha waxashnimo ee ay umadaha kuwooda ugu adagi ku jiraan, taas oo ah qalbi enegnaan, madax adayg, indha adayg, santaaglayn, iwm.

Haddayba dhacdo in ay reer baadiyahaasi hawlgal is la fuliyaan way adag tahay iyaga oo ay arintoodu is raacday, waxaa hogaaminaya hadafkooda dhuuni raacnimo, oo waxa kelya oo ay ku kacaan waa dhuuni doon isaga ayaana qabta. Laakiin reer magaalku waxay ku dhaqmaan ka soo horjeedka middaas, isugumana yimaadaan qabyaalad awgeed ee way kala daadsan yihiin.

Isaga oo hadalkiisa sii wata ayuu Ibnu khalduun leeyahay; weligeed qabyaaladi taariikh iyo raad wanaagsan ma reebin, balse way dumisaa oo iyada ayaa sacabada ku leefta ilbaxnimadii la xariiqo. Wayse iska adag tahay in ay dhab ahaan u dumiso dawlad ama ilbaxnimo curdun ah, waxaase la arkaa in ay cardaadiqaha ka dhigto dawlad gabawday oo

caajistay (dhabcan baadilna ku socotay). (bog:184 - 191) ee kitaabka hoos ku xusan.

Wuxuu kale oo yiri; Runtii reer baadiyaha iyo reer guuraagu waa kuwa ugu awoodista badan in ay guulaystaan marka foodda la is daro, oo way diirtaan halka ay galaan, sidaa darteed iyaga ayaa u sabab ah dhicitaanka ilbaxnimooyin badan iyo is hortaagga nidaamyo fara badan, taasi waxa ay keentay in ay u sabab noqdaan dhicitaankii iyo wiiqitaankii dawladihii caanka ahaa oo dhan.

Taas ah in ay kol walba ka guulaystaan cidday is galaanna waxaa u sabab ah dhawr arimood oo ay ka mid yihiin;

In ay awood buuxda u leeyihiin la dagaalanka qola kaste kol haddaynan ku wadan wax masaalix ah, In aysan dhawrin wax sharci ama qaanuun ah oo dabra, In ay kaga soo tageen ahalkoodii iyo guryohoodii si ay u soo dagaallamaan, In ay horay ugu soo taba barteen ugaadhsiga xayaanka duur joogta ah, In aysan ku noolaan jirin risqi lagu keenay dhib yari ee ay noloshoodu halgan iyo xarbi ku taagnayd,

Sidaa darteed ay uga adkaysi badan yihiin shiddooyinka kuwa kale, waxaana qodobadaas oo dhan ka sii daran oo si wacan u garab istaaga kuwa kale oo ay ka mid yihiin; In ay iyagu yihiin kuwa wax doonaya mar kaste oo ay ka maqan yihiin waxa ay kuwa kale haystaan, In aysan lahayn hanti gooni ah oo ka burburaysa, iyo in aysan garanayn wax wadan iyo xuduud toona ah oo ay ku ekaadaan ee aysan

marnaba garawsanayn gef xuduudeed ay galeen iyo guul dheeraad ah oo ay soo hooyeen toona.

Haddaba kuwaas oo dhami waxa ay ku dhiirri geliyaan reer baadiyaha in ay isaga gooshaan qaarado iyaga cagta ku xaaqaya wax alle iyo wixii ka soo hor baxa ee hanti iyo nafba ah, illeen iyaga lacagi kama geline. Sidaa awgeed waxaa haboon in halaagooda loogaga faa'iidaysto habab kale.

Kolka ay reer baadiyuhu hantiyaan boqortooyo ama xukun jiray oo ay kala qayb galaan Ahlu nicmadaas barwaaqadii iyo baraarihii ay ku jireen way xasilaan oo halkaa ayey ku nastaan, taasina waxa ay tusinaysaa in uusan hadafkoodu ahayn xukun doon ee ahaa helitaanka guud ahaanba kheyraadka adduunyada, shahwada jirka, iyo macmacaansiga

nafta. Sidaa awgeed qabyaaladdu waxa ay jidka isu taagtaa horukaca, waxayna ku raalli ahaataa kasabka maadiga ah iyo hunguriga aan kaydsamin.

Ibnu khalduun oo weli ka sii waramaya qabyaaladda ay sababaan reer baadiyaha kaca waxa uu sii sheegayaa sida ay ula macaamiltamaan dawladaha ay afgambiyaan, wuxuuna ka yiri:

Runtii wareegitaanka xukunka ee uu ka wareego qolo kuna wareego qolo kale oo hab qabiileed ah ma dhaliyo wax aan dib u dhac ahayn, mana reebo raad taariikheed, ilbaxnimo iyo cimri toona;

Hadday dawladaasi mid shakhsiyeed (qoyseed) tahay sida middii; Anwaa sharwaan, tii Hiraqle, tii Cabdil-malik Bin marwaan, ama tii Rashiid

shakhsiyaadkeedu waa kuwa is daba haysta oo kursiga isu baneeya, kuma yimaadaan dhib iyo qaxar, sidaa awgeed waxa ay ku qasban yihiin in ay xifdiyaan jiritaankii iyo karaamadii awoowayaashood, ayna waariyaan xukunkooda iyaga oo ku dadaalaya in ay wax wanaajiyaan.

Hadduuse xukunku ku wareego hab qabiileed ah qolo qola kale afgambisay ama xoogtay, labadaasd qolo oo aan waxba isu gelinin, markaa waxaa soo food saara dawladdaas burbur dhan walba leh iyo musiibooyin ma ahadho ah oo asiiba, waxaana la arkaa in qalqalkaas iyo burburkaasi uu saameeyo guud ahaanba jiritaanka dawladdaas, tusaale ahaan dawladdii; Roomaanka, tii Furus, iyo guud ahaanba tii Carabta.

Ibnu khalduun oo in badan ku cel celiyey sharrixidda iyo qeexitaanka qabyaaladda ama danaanada reer baadiyaha waxa uu sharax gaaban oo aan ku soo afjarayno ku yiri;

Runtii Jiilka ugu horeeya ee danaanada ama casabiyaddu waa dadka badawda ah ee ku barbaaray baadiyaha, oo kala indha qaaday hawsha baadiye, kana qaatay edebtooda iyo asluubtooda halkaas, taas oo ay ku askumeen guud ahaanba dabeecadooda iyo dhaqan nololeedkooda, taas awgeed qofba qofka uu ka badawsan yahay waa qofka uu ka reer baadiyeysan yahay.

Haddayse dadka reer baadiyaha ihi u soo guuraan magaalada oo isku dayaan dhalan iyo dhaqan rog way ku guulaystaan inkastoo ay muddo dheer ku

qaadanayso sida ay ugu guuraan nololsha ilbaxnimo ee dhabta ah (Dhar magaalo xirashadiisu waa dhawdahay laakiin dhal magaalo noqoshadeedu waa dheer tahay). eeg; Dr; Maxamed Caabid Al-jaabiri, kitaabkiisa;

مركز دراسات الوحدة :، طبعه(فكر ابن خلدون العصبية والدولة) العربية ، بيروت ، 1992م.

DABAR GOYNTA DANAANADA.

Kol haddii la dareemo daannada iyo hagardaamada ay leedahay danaanadu, waxaa lagama maarmaan ah in lagu eego il baaritaan oo loogu kuur galayo dariiqaddii lagu xidida siibi lahaa oo looga rujin lahaa quluubta aadanaha iyada oo laga sii xoqayo mirirka uu ku reeb, waayo waxa uu bado waxa uu baro ayaa ka sii ballaaran.

Danaanaynta ama tacasubka oo ah hooyada qabyaaladda, ayey tahay in loo maro jid dheer oo lagu cirib tiro, hadaba si aan waddadaas dheer cagta u saarno waa in aan marka hore ka xaaqnaa laabteenna dhalanteedka ay ka hadalkiisa ku xeel dheeraadeen takhaadiirta cilmiga bulshadu, kaas oo ah in sababta

danaanadu ay keliya tahay jaahilnimo barax la'. Waxaa keliya ee dawadeeda ku filanna ay tahay dhawr sano oo wax barasho lagu jiro,

Sida ay caddaynayaan culimada cilmiga nafsaaniga iyo kuwa Bayo'lojigu danaanadu waa cudur khatar ah oo jirro calooleed iyo jirro caqliyeed ah, maxaa wacay danaanadu waa hallaasi waxashnimo ah, wuxuuna caloosha ugu dhacaa sida Furuqa. mana lahan daawo aan ahayn Falsafad ruuxi ah oo in yar in yar loogu abuuro qalbiga, sidaas waxaa ku qoray kitaabkiisa (Qabuurihii danaanada/tacasubka), sanadkii 1767 kii, ninka la yiraaho Voltair, oo noolaa 1694-1778, ahaana mufakirkii ugu caansanaa qarnigiisii.

Haddaba hadaad daaweyn karto cudurada kale ee khatarta ah sida; waallida, daacuunka iyo tiibishada aad bay u sahlan tahay in aad daaweyso cudurka danaanada ama hiillo eexeedka.

Waxaa laga yaabaa in aad hesho kuwii aqoonta lahaa oo kaga daran kagana ad adkaan badan danaanada kuwii aan wax barashada lahayn taasuna waxay ku baraysaa in uusan cilmi keli ihi wax tarinin weligiisba; sidaa awgeed waxaa lagama maarmaan ah in la helo saddex shardi oo kala ah;

1- in jirrooluhu ogaado in uu jirran yahay.
2- in uu yahay mid doonaya in uu caafimaado.
3- in uu raaco oo qaato tusaalooyinka uu siinayo dhakhtarku marka daaweyntiisa.

Haddaan xaalka sii falanqayno waxaa ka mid ah daawooyinka uu qaadanayo danaaneeyuhu si uu u caafimaado;

bulsha dhex gelid, wada hadallo, culima iyo caamaba la sheekaysi, asxaab iyo is wadeysi jecayl, iska saamixid, dul qaadasho, tix gelin, dhimrin, iyo ka tanaasulid. Faylasuufkii Jarmalka ahaa ee la oran jiray; Lessing,, ee noolaa 1729- 1781 ayaa ku sheegay masrixiyaddiisii 1778, hab edebeedka fikradda isu dhimrinta ee diimaha in ay ahaato uun dariiq camal wanaagsan samayn aysanna noqon dariiq danaano axmaqeed iyo hiillo habar wacad aan halna laga eegayn ee keliya ah naf qancin iyo isu naagayn marin habaw ah, taasina dhab ahaantii waa musiibo Alle naga koriyo.

Danaaneyntu waxay ka kooban tahay laba unug, mid togan iyo mid taban; kan togani waa in qofka danaaneeyaha ihi uu rumaysan yahay in kooxdiisa uu ka tirsan yahay, ha ahaato qabiiladiisa, dalkiisa, madhabtiisa, tay doontabee, ay ka gobsan tahay kuwa kale ama uga sarayso si kale oo Rabbaani ah, midka tabanina waa in uu danaaneeyuhu rumaysan yahay in kooxaha kale ee ka soo horjeeda ay gun hoose oo la yaso yihiin kana liitaan midda uu ka tirsan yahay.

Kolkaa waxaa muuqata in labadaa unugi ay isma huraan yihiin, maxaa yeelay in koox ama qofi rumaysto in uu inta kale ka gobsan yahay waxa si toos ah uga dhalanaya in ay inta kale u arkaan wax iyaga ka liita ama ka hooseeya, waxayba taasi la mid tahay sida qof koray buur dheer oo hoos u soo eegay dadkii arkayna in ay yihiin wax u yar yar sida

Quraanjo oo kale oo iyaguna markay kor u eegaan ay u arkayaan hal Quraanjo oo aan waxba kala maqnayn, naf ahaanna u habaabay, sidaa uun si la mid ah ayey kooxiba kooxda kale ugu aragtaa mid quraanjo oo kale ah.

Waxaana la isku raacsan yahay in xamaasadaha qabiileed ama diineed ee ka dhasha danaanada noocakan ihi aysan weligood noqon kuwa lagu lib helo ee ay ku dambeeyaan hungoobid iyo ceeb, si kastoo ay tahay bulshada lagu qaado gurmadka ama ol-olaha hiilled ee noocan ah wey soo celisaa oo lama marsiin karo ha ahaato bulshadu beeraley, daaqsato, wershadley, ama ganacsatee waxay si fudud u gartaan in uu kani ku taagan yahay xamaasad naf jeclaysi.

Si kastaba ha ahaatee waxa dhibaatada weyni ay ka soo gaartay Aadanaha waa dhinaca taban ee Danaanada, taas oo ah in dad kale la liido, hadaba danaaneeyuhu waa kan xasda oo liida kana horjeesta dadka intiisa kale, kolka danaanadu waxay salka ku haysaa aragti taban oo lagu eegayo dadka, qofka danaaninayana fikraddiisa uu ku eegayo dadka kale waxay salka ku haysaa xaasidnimo, isla weyni iyo liidid, wuxuuna had iyo jeer u janjeeraa in uu dhibaato geysto iyo in uu wanaaggiisa ama gobnimadiisa sugo kuna xaf goosto.

Danaanada astaameheeda waxaa ka mid ah in jirroolaha jirradaas qabaa uusan ogolayn in laga hadlo arinteeda asal ahaanba, maadaama uu u arko in waxa uu u danaanaynayaa ay yihiin kuwa keliya ee sax ah isna uu yahay ruuxa ugu saxasan, sidaa darteed uma

arko in aqoon baaristeeda ama cilmi baaristeeda ay u leeyihiin wax faa'iido ah inaba haba yaraatee, isla markaasna uma uu dul qaadan karo in fikraddaas laga shaki geliyo ama la isku dayo in la buriyo ama laga hor keeno fikrado kale, taasina waa tan ka timaada maan gaabnimadiisa,

Kolka haddii uu wax xoogaa aqoon ah yeesho ama ilbaxo waxay taasi u noqonaysaa mid aan caqli ku salaysnayn, taas awgeed danaaneeyuhu badanaaba waa ka digtoon yahay in uu la kulmo indheer garatada oo ma jecla in uu wax ku darsado taas macneheeduna ma ahan in qof kaste oo garaad gaab ihi yahay danaaneeye (mutacasib).

Tan labaad danaaneeyuhu wuxuu u jan jeersadaa afkaar yar oo fudud taasna waxaa ugu wacan garaad

aqooneedkiisa gaaban, hase ahaatee astaanta ka dhigaysa qofka danaaneeye dhamaystiran waa in uu had iyo jeer isku dayo in uu aragtidiisa inta kale qaadsiiyo iyo in uu wixii ka soo horjeeda dafiro duudsiiyana xaqooda.

Danaaneeye ama gardarro ku hiilliye ma kala saaro rumaysadka iyo ku qancidda, hadduuba kala saarana wuxuu u kala saaraa si uu rumaysadka uga dhigo waddo uu u sii maro ku qancidda, sidaa awgeed ayuu kaasi u la nool yahay fikradaha uu rumaysan yahay isaga oo ku raaxaysanaya oo ka helaya, si kastaba arintu ha ahaatee akhristow kala soocidda rumaysadka iyo ku qanciddu waa lagama maarmaan, maxaa yeelay waa astaanta u dhexeysa danaaneeyaha iyo maskax furanaha.

QUR'AAN IYO XADIIS

QALAD LAGA FAHMAY.

Waa wax aad iyo aad looga qarracmo oo laga murugoodo in la adeegsado ama la isticmaalo iyada oo fursad ama daliil wax tusisa ama wax bannaysa weliba amarta ama ammaanta looga dhiganayo si qalad u fasirasho ah, kas ama jaahilnimo midday doonto ha ku dhacdee, taas oo markaas keenaysa in ficillo xaaraan ah lagu gaaro, in kastoo ay aad u badan yihiin Aayadaha ama Xadiisyada lagu caadaystay qalad u isticmaalka, hadana ma wada koobi karno ee waxaan ka soo qaadanaynaa hal Aayad iyo hal Xadiis oo naga quseeya mawduuc ahaan, kuwaasina waa;

(ياءيها الناس اناخلقناكم من ذكر وأنثي وجعلناكم شعوبا وقبائل لتعارفوا ان اكرمكم عند الله أتقاكم ان الله عليم خبير) الحجرات:13.

(Waar hooy Dadow waxaannu idinka abuurnay lab iyo dhedig, waxaanan idin ka dhignay shacabyaalo iyo qabiilooyin si aad isu aqoonsataan, ruuxase idinkugu sharaf badan Eebbe agtiisa waa kan idiinkugu dhawrsasho badan, Eebbana wax walba waa ogyahay)Al-xujraat:13.

Waxay dadkeenna qaarkood u fasirteen Aayaddaan sidii in ay tahay mid faraysa ku dhaqanka qabyaaladda iyo is kala takoorka ku dhisan nasab nasabaynta, oo waxaad arkaysaa iyaga oo kugula doodaya ama ku andacoonaya; qabiilaysigu waa jiraa,

oo Qur'aanka ayaaba sheegay in dadku ay kala nasab fiican yahiin, waxaana jira in dadka Ilaahay mar horeba u kala saaray nasab iyo nasab dhiman.

Dadkaasina iyaga oo taas ka dhiganaya fursad ay xumaha ku bannaystaan ayey ku duraan reer hebel nasab xumo, reer hebelna ku duulaan iyaga oo bannaysanaya dhiiggooda iyo xoolahooda reer hebel ahaan awgeed.

Dabadeedna inta ay arrintaas foolxumada ihi aad u sii kortay ayey gaartay in la yiraaho; Naagtan waxaa qabay oo laga soo furtay nin reer hebel ah ee shiikhow sow lama mehersan karo, ma meher ahaan baa loo qaadan karaa kii ninkii reer hebel,? Shiikhow hebel oo ku dhintay dagaalkii reer hebel lagula jiray

ma Karfan iyo Janaaso ayuu ubaahnaa sow Mujaahid maahayn? iyo fal-fal xumooyin kale oo badan.

Waxayna tahay Aayadda sida ay sheegayso ee loo fasirayaa sidatan;

1- In aan ku cibri qaadanno oo ku xusuusanno awoodda Alle inuu naga abuuray lab iyo dheddig, isuna keen maceeyey si aan u sii wadno taranka Aadanaha.

2- in aan ku cibri qaadanno oo ugu mahadnaqno Eebbe sareeye sida uu nooga kala dhigay shacabyaalo iyo qabiilooyin si aan isu kala aqoono, si aan isu xushmayno, si aan u ilaalino taranka aadanaha anaga oo aan u isticmaalayn fal xaaraan ah oo aan markaa la waayin wax daryeela kuwa la dhalo, si aan isu kaalmaysanno,

3- in aan ku dadaalno ka cabsashada Alle iyo u cibaadaysigiisa si aan u gaarno derajada sare ee uu nala doonayo.

4- in aan isku xushmayno cabsida Ilaahay.

5- in aannu ogaanno in kan noogu sareeyaa uu yahay hadba kan noogu Alle ka cabsi badan.

6- in aanaan isu dagaalin qabiil qabiil ee aan ogaanno in aanaan kala fiicnayn mar haddaanaan isku kala fiicnaysiinayn cabsida Alle.

7- in aannu ogaanno in Eebbe wax walba oge uu yahay kan keliya ee cilmiga runta ah haysta, aanana ku kalsoonaano falalkiisa maadaama uu naga ogyahay isagu.

8- iyo macnayaal kale oo wada kheyr samayn iyo kheyr ogaan ah kana soo wada hor jeeda oo laf dhuun gashay ku wada noqonaya iskala qabiilaynta.

Hal xadiis oo isna qalad laga fahmay waxaan u soo qaadan karnaa tusaale ahaan;

(ينكح المرأة باربعة لمالها ولجمالها ولحسبها ولدينها فاظفربذات الدين تربت يداك)

(Waxaa lagu guursadaa Afar; Maalkeeda, Quruxdeeda, Nasab hooyaadkeeda, iyo Diinteeda, ee adigu ka qaado tan diinta leh gacantaaduba ha dhul dhacdee).

Waa khasaaro in maanta nin weyni kaa la soo horjeesto nasab iyo nasab dhiman diintaaba sheegaysa, waayo laba aan isku kuf (isku jil, is geyid) ama isku heer nasab ahayn isma guursan karaan saa xadiiskanaaba sheegaye.

Haddaba dhahaha warkaas xunoow ma indhahaad la'dahay mise qalbigaa ku daboolan miyaanad fahmi karin hadalka Nebiga ee ah sida xadiiska ku cad lagana fahmayo; Waxay dadka kale ku guursadaan afartaas nooc ee adigu ha noqon sidooda oo kale ee keliya ka raac tan diinta leh wax walbaba ha kugu qaadatee?.

Midda kale waxaa qalad loo fahmay macnaha erayga Xasab oo loo qaatay in uu yahay nasab qabiili, mase ahan ee waxaa weeye sharafta iyo karaamada ay gabadhu ka dhaxashay hooyadeed sida reer dhaqidda iyo wixii la xiriira arimaha gaarinimda iyo gobnimo dhawrka ee naag loogu xilan karo.

Weliba waxaa intaas sii dheer in la yiri waxa ay ku habaaran yihiin kuwii aan Alle dartii isu guursani

sidatan soo socota; (labadii isku guursata qurux awgeed Ilaah uma kordhiyo wax aan foolxumo ahayn, labadii isku guursata maal awgiis Ilaah uma kordhiyo waxaan faqri hayan, labadii isku guursata nasab awgiis Ilaah uma kordhiyo waxaan nasab xumo ahayn (markay isla guri galaanba).

Waxaana taa u marag ah oraahda suubanaheenna Muxamed NNKHA, ee ah;

(ولاتزوجوهن ..ولاتزوجوا النساء لحسنهن فعسي حسنهن أن يرديهن أخرجه (لأموالهن فعسي أن تطغيهن ولاتزوجوهن الا علي الدين القزويني وابن ماجه.

(Ha u guursanina dumarka wanaagooda quruxeed, waaba intaasoo ay ka sal guurtaaye, hana u guursanina xoolohooda awgood waaba intaas oo ay

taasi qooq iyo fasahaad ku keentaye, hana u guursanina waxaan ka ahayn diinta). W. soo saaray xadiiskaan; AL-Qayzuuni iyo Ibnu Maajah.

Waxaad kale oo in badan aragtaa akhristow sheekh Soomaaliyeed oo ku guubaabinaya qoladiisii in ay ku duulaan cid hebla isaga oo ku leh; Nebigaa yiri;

(من قتل ,من قتل دون نفسه فهو شهيد ,من قتل دون ماله فهو شهيد دون اهله فهو شهيد)

(kii la dilo isagoo maalkiisa difaacanaya waa shahiid, kii ladilo isagoo naftiisa difaacaya waa shahiid, kii la dilo isagoo ahalkiisa difaacaya waa shahiid). Haddaba inagu nafteenaan difaacaynaa oo reer hebel iyagaa nagu bilaabay weerarka iwm,

Taasoo uu ka dhaadhicinayo ummaddaas inay iyagu yihiin kuwa saalixiin ah oon marnaba qaldamin lagana gardaran yahay had iyo gooraale, isagoo soo xusuusinaya sheekooyin hore oon la hubin sugnaantooda kuna salaynaya waxa maanta taagan.

Haddaba akhristaw waxaas oo dhan iyo kuwa ka sii daranba waxay ka yimaadeen fahamyo qaldan oo lagu dhex faafiyey bulshadeena loona baahan yahay in maanta dib looga saxo.

Cutubka Labaad:

QABYAALADDA.

QABIIL QALAD LAGA FAHMAY.

Bilowgii ilaah wuxuu abuuray Aadam suu feertiisa ka soo saaray Xawo, dabadeedna wuxuuba ka firdhiyey labadoodii dad fara badan oo rag iyo dumarba leh, say waa faafeen oo dunidii dhex xuleen ka dib markii laga soo saaray jannadii gar darradooda awgeed. waxayna guda galeen oo halkaas ka bilaabeen qaraabasho iyo quutul-yowm raadsi oo waxay yeesheen koox-koox uwada noolaansho si ay isu difaacaan ama ay u wada shaqaystaan.

Taas oo dhalisay in ay is jaallaysi ku kala tagaan oo iska soo horjeestaan cadawyana isu noqdaan halkay kolkii hore iska dugsanayeen cadawga habar-dugaag, weyna khilaafeen hadafkuu Alle u abuuray ee ahaa in ay isaga uun caabudaan in yar oo Alle naxariistiisa u hillaacshay mooyee, oo wuxuu Ilaah faray in ay uga mahad naqaan siduu u badiyey ugana dhigay laan dheeraha, iyo siduu ugu sameeyey tolka iyo xigaalada iyo nasabyada ay ku abtirsanayaan si ay isu kala aqoodaan una gartaan isku kaalmaysiga samafalka, iyo si ay isaga ilaaliyaan anshax-xumada iyo wacalnimada ama garacnimada aan lahayn abtirsiga, taas oo Aadanaha ka duwaysa xoolaha iyo xayawaanka kale ee duur joogta ah.

Waxay tahay xusuusta weyne kale ee la doonayey; in lagu fikiro iyada oo lagu cibri qaadanayo siduu

Ilaah ruux keliya uga soo saaray ummadaha intaa tira iyo tayo la eg, Ilaahay oo taas inoo faah-faahinaya ayaa yiri;

(ياأيها الناس اتقوا ربكم الذي خلقكم من نفس واحدة وخلق منها زوجها وبث منهما رجالا كثيرا ونسا واتقوا الله الذي تسألون به والأرحام ان الله كان عليكم رقيبا) النساأ:1.

(Dadow/dadow ka dhawrsada Eebihiinna idin ka abuuray naf keliya (Aadam) kana abuuray xaggeeda haweeneydeeda (xawo) kana abuuray xaggooda rag iyo haween fara badan, kana dhawrsada Eebihiinna aad wax isku warsataan iyo qaraabada Eebana wuxuu u yahay korkiinna ilaaliye).

Hadaba Ilaah wuxuu si cad inoogu sheegayaa in ay tani ka mid tahay Aayadaha iyo daliilaha waa weyn ee lagu rumaysan karo jiritaankiisa iyo awooddiisa dhabta ah ee aan laga daba imaan karin, abuuritaanka

uu abuuray dadkan faraha badan ee isku midka ah hadana kala nooca ah marka loo eego si kale, bal arag oo u fiirso xagga luuqadaha, midabka, fikirka, dhaqanka, caadada, iwm. taasna macneheedu ma ahan in ay isugu faanaan midba siduu Ilaah u sameeyey iyo hooyaduu ka dhaliyey iskuna laayaan taas awgeed ee waxay tahay in ay u noqoto caddayntii ay ku rumaysan lahaayeen awoodda iyo doonista Eebe, Ilaah wuxuu yiri;

(ومن اياته خلق السموات والأرض واختلاف ألسنتكم وألوانكم ان في ذلك لآيات للعالمين) الروم:22 .

(Waxaa ka mid ah aayaadka ku tusinaya (qudrada) Eebe samooyinka uu abuuray iyo dhulka iyo kala duwanaanta afkiinna/luuqadihiinna, iyo midabkiinna taasna calaamad baa ugu sugan kuwa cilmiga leh) Ar-Ruum:22.

Haddaba ummadaha intaas la eg oo dhan shaqada uu Ilaah ka sugayaa waa uun inay isaga keliya caabudaan, Ilaah wuxuu yiri;

(وما خلقت الجن و الأنس الا ليعبدون) الذاريات:56

(Jinni iyo insiba waxaan cibaadadyda ahayn umaanan abuurin) Ad-Daariyaat:56.

Isku soo duuduub arintee, akhristow waxaan kuu sheegi karaa uun in ay tahay sababtay ku timid qabyaaladdii xumayd ee dhex martay, dabadeedna marisay anaga iyo quruumo badan oo naga sii horeeyey ay ahayd oo keliya in ay khilaafeen sababtaas Ilaah u abuuray iyaga iyo ummadaha kale ee kula nool ifka, oo ay u beddesheen isu faan iyo is xukun doon ku dhisan qab weyni iyo anaa ina hebel ah .

FASAHAADKA

QABYAALADDA.

Beri hore oo iminka laga joogo in ka badan 1417 sano ayey dadka Carbeed ee walaaleheen ah aanna wada dhaladka iyo dhaqan wadaaga leenahay ku dhex noolaayeen duni madow oo malaasan, waxay dadku dhex muquurayeen mawjado mugdi ah oo ku meersan noloshooda dhan walba oo laga eegaba; ma jirin cid hawaysanaysey in ay ka han weynaato ama ka hanqal taagto iyada oo kor soo hanqaloocsanaysa si ay uga baxdo hirarkaas ku meersan ee hammi jebiyey.

Ugu dambaystiina waxayba isaga raalli noqdeen in ay isaga xaraysnaadaan xayndaabkaas cadaabeed, taas oo ahayd mid ku dhex wareeganaysay dhammaanba dhaq-dhaqaaqyada guud iyo ilaha noloshooda oo dhan.

Tusaale ahaan waxay ahayd noloshooda bulshadu mid ka dheelliday dhan walba, sida dhanka dhaqaalaha, caafimaadka, siyaasadda, nebad gelyada, akhlaaqda, xiriirka bulshada, xeerka qoyska, xanaanada caruurta iyo hooyada, dhismaha iyo hawlaha guudba. xag diin ahaanna haba sheegin oo hadday diin rasmi ah haystaan kama burbureen dhinacyadaas oo dhan, ee ka dib markay diin la'aantu ku dhacday ayaa waxaa isku mar ku wada habsaday musiibooyinkaas culus oo wada camimay.

Waxayna noqdeen kuwo ka tegay DHUR IYO DHAQANBA, iyaga oo ku sii qoodaynaya waddada hoogga iyo halaagga, caadaystayna inay cagahooda ku raadsadaan wax Alla wixii kaamil ka sii dhigaya habawga noloshooda adduun iyo aakhiiraba, waxaana ka mid ahaa dhaqamadii xun xumaa ee ay ku sii fog-fogaanayeen, kuwa fara badan oo ka mid ah maanta dunida dambaysa aafeeyey sida:

Kala sarayn iyo dabaqado gumaysi oo ku dhisan maal iyo magac qabiil, taas oo ka imaanaysay ku tartan iyo ku faantan laan dheerenimo, abtirsiiyo, boqortooyo cududeed, durid qabiil iyo hoosaysiin, yasid adeegato iyo dan yar, dhul goosi iyo sed buursi, amar ku taaglayn, shaqo isku cay IWM. taasina waxay caadaysay fool xumooyinka kuwooda ugu sii daran sida; dilka, dhaca, boobka, bililiqaysiga,

kufsiga, dhillaysiga, qaniisnimada, caasinimada, collaysiga, cuqdadda, xaasidnimada, xaqdiga, naf jeclaysiga, anaaniyadda, cibaada li'ida, munaafaqnimada IWM.

Waxaa dhacday markay xaqdigii iyo xaasidnimadii karaardhaafeen in dadka reer tabareedka ah laga cayrsho guryohooda iyo deegaannadooda isla markaasna aan loo jixin jixin ee lagu qoslo lana yaso iyada oo lagu leeyahay waa Boon, Midgo, iwm ee yaan gabdhohooda la guursan ka dib markay ku luuf-luufaan qaxootinimo aan miciin lahayn iyaga oo ku qanacsan busaaradaysi iyo balan baal, iyada oo ay hantidoodiina u xaraysan tahay kuwa kale oo si xaq darro ah ku bashiiqsanaya, una baatulaya si loofarnimo ah. kuwaas oo lagaba yaabo in ay markii hore ka hanti yaraan jireen.

Masaakiinta laga adkaado waxaa lagu qasbi jiray in ay isla hantidoodii ku shaqeeyaan iyagoo aan sheegan karin oo ka ajnabi ah iska daa in ayba isku dayaan inay wax uga dhaqmaane, arimahaas iyo kuwa kale ayaa haddaba hooyo u ahaa xaq darrooyinkii iyo is dullaysigii ku qotomay kaa xoog weynida ee wiiqaysay is aaminidda iyo isku kalsoonida xataa tii dhex mari lahayd laba is dhashay iyo laba isla dhalatay keenaysayna nin walbow naftaa, sidaa awgeedna horseedaysay isku dhaca wada gaarayey min beel ka beel ilaa iyo bah ka bah.

Hadaba waxaa mar walba halkaas ka maqnaa tolnimo, wax wada cun, dhalyo, habar wadaagnimo, xididnimo, iyo guud ahaanba qaraabanimo nooc kastoo ay ahaataba, waxayna mar walba isku haysan

jireen wax aan la taaban karin oo aan la garan karin biyo dhocooda iyo nuxurkooda dambe toona, amaba haddii la fahmi karo ah gar darrooyin aan geedna loogu soo gaban, sida reer hebel waxay u haystaan in aanaan ka sarayne aan tusno awoodooda oo aan ka dhigano midgo aan addoonsano, dagaalladii dhex mari jiray hadaan ka xusno kuwa aan kaga cibri qaadan karno waxaa kamid ah.

Dagaalkii faraha looga gubtay ee murruqsaday mood iyo noolba ee dhex maray reer Cabas iyo reer Dibyaan kana dhashay labadii faras ee Al-Qabraa iyo Daaxis, sababtii uu dagaalkaasi u kacayna waxay ahayd; labadaas faras oo lala tartansiinayey fardo uu nin cidda kale ka mid ahaa leeyahay ayaa jidkii loo istaagay oo laga xanibay oradkii intay ka hor marayaan kuwii ninka kale ee la tartamayey ka dib

markay is fara jigeenna uu nin walba u habar wacday ilmo adeerradiis isaga oo halku dheggiisu yahay; Tol beelayey"": eeg;

لجواد علي .تاريخ العرب قبل الاسلام

Waxaa kale oo isna ka mid ahaa dagaalladaas lagu balaan balay kii dhex maray reer Taqlab iyo reer Bakar oo socday Afartan sano, sidaas darteed fasahaadkii waagaas dhulka Carbeed ka taagnaa wuxuu ahaa mid cirka isku shareeray oo gaaray ilaa heerka baraka laayda maanta soomaaliya ka taagan oo kale, waxaa ka mid ahaa halku dhegyadii nacasnimo ee ay dadkaasi ku hadaaqi jireen isla kuwa ay maantaba soomaalidu ku hadaaqdo sida; (Fiqhi tolkii kama janno tago), (Uhiilli walaalkaa hadduu wax dulmiyo iyo hadii la dulmiyaba/gar iyo gardaraba), (Anigu waxaan ahay uun reer hebel hadday

xoogaystaanna waan la xoogaysan, hadday hoogaanna waan la hoogin /hadday guulaystaan guul hadday jabaanna jab).

Marka ay waayaan cid ay la dagaallamaan waxay dareemi jireen dadnimo xumo u soo hoyatay oo waxay dhihi jireen, (haddaan weyno qolo aan la dagaallanno oo cadaw inoo ah waxaan la dagaallannaa walaalladayo iyo ilmo adeeradayo, si ay hamuunta dagaalku inooga jabto).

Sidaas darteed waxaa maanta adduunka oo dhan looga magacaabaa caadooyinkii, dhaqamadii, dagaalladii, iyo dadkii waagaas jirayba; Jaahilliyadii (casrul- jaahiligii), dadka Carbeed ee wax garadka ihina markay taas maanta soo xasuustaan wey ka yaq-yaqsadaan oo jiriirico naxdineed baa ku jab jabta,

markaa ayey ka yax-yaxaan in ay dadka kale la sheekaystaan oo gooni u baxaan.

Akhristowse hadaad waxaas oo dhan ogaatay ma is weydiin karnaa saddex su'aalood oo kala ah;

1-Annaga Soomaali ihi maxaan u dhahnaa waagii casrul- jaahiligii? miyaan ka marannahay xumaanahaas iyo sifooyinkaas caasinimo ee ay Carabi waagaas ugu caan baxday jaahilnimada?

2-Haddaanba ku takhasusnay sifooyinkaas xun xun ee aan weliba sii casriyeysanay, annaga oo la kaashanayna duni cusub, horumakii la gaarayna u adeegsanayna xagga xumaha iyo fasahaadka, sow nala kuma tilmaami karo Jaahiliyiin, oo ma diiddan tahay in berrito markay jiilalkeenna dambe wax

fahmaan ay nagu oran doonaan waagii jaahiliyada/casrul- jaahili?.

3-Haddii Carabtaas Aakhiro uu ilaah ku cadaabayo fal-fal xumooyinkoodaas awgoodse annagu maxaan nahay? ma xiriir gooni ah baa nagala dhexeeya Ilaahay? sow ma ogid in ayba iyagu nagaga dhawyihiin xagga mar-marsiyaha oo leeyihiin diinba nama hor oollin, cid wax noo sheegtana maannu haysan?.

QABYAALADDA

WAA LAGA DIGAY..

Ilaahay wuxuu in badan inooga digay qabyaaladda iyo waxyaalaha sababi kara sida; kuwa sal dhigga u ahaa qabyaaladdii Carabtii hore iyo tan Soomaalida maanta ee ay ka mid yihiin isu faanka iyo isla weynaanta oo wuxuu yiri;

(يا أيها الذين آمنوا لايسخر قوم من قوم عسي أن يكونوا خيرا منهم ولانساء من نساء عسي ان يكن خيرا منهن ولاتلمزوا أنفسكم ولاتنابزوا بالآلقاب بئس الأسم الفسوق بعد الأيمان ومن لم يتب فؤلئك هم الظالمون. يأيها الذين أمنوا اجتنبوا كثيرا من الظن ان بعض الظن اثم ولاتجسسوا ولايغتب بعضكم بعضا أيحب احدكم ان يأكل لحم أخيه ميتا فكرهتموه واتقوا الله ان الله تواب رحيم) الحجرات:11-12.

(Waar hooy kuwa xaqqa rumeeyow yuunan yasin ragna ragga kale, waaba intaasoo uu kaba kheyr badan yahaye, Haweenna yeynan haween yasin waaba intaasoo ay ka kheyr badan yihiine, Hana ceebaynina naftiina (dhexdiinna), Hana isugu yeerinina naynaas (koofaar) xun, waxaa xumaan leh magaca faasiqnimada iimaan ka dib, ciddii aan tawbad keenina waa daallimiin). Al-xujraat;11.

(Kuwa xaqqa rumeeyow hooy; ka dhawrsada wax badan oo mala -mala ah, maxaa yeelay malaha qaarkiis waa dambi, hana is jaajuusinina, qaarkiinna yuusan qaar kale xamanin, miyuu jecel yahay midkiinna inuu cuno hilibka walaalkiis oo meyd ah,

waad necebtihiin arintaas, Eebana ka cabsada waa tawbad aqbale naxariiste ehe.) Al-xujraat;11-12.

Si looga hortago isku dhac, isu faan, is kala qoqob, is ximin, isu collaytan, iyo guud ahaanba wixii keeni kara ficiltan qabyaaladeed ayuu ilaah horayba u moosay ilihii ay xumaanahaasi ka soo butaaci lahaayeen kuna baddelay ilo kale oo kheyr badan, sidaa darteed Ilaah waa kan ku mamnuucay Aayadahakan;

1-In ay laba cidood isku jees-jeesaan ama cidi cid kale yasto,rag iyo dumar kay ku ahaataba.

2- Inay cidi cid kale ceebayso.

3-In ay cidi cid kale ama qof, qof kale ugu yeero naynaas uu diido ama uusan jeclayn.

4- In ay cidi ka san taaglayso inay tawbad keento.

5-in ay iska dhahaan wax walba say latahay ama mala-malaynayaan .

6- Inay is jaajuusaan, oo qof qof kale ugu noqdo tif tif si xumaan abuurnimo ah.

7-In qaarba qaar xanto ama qof qof xanto.

8-In aysan ka dheeraan cabsida Eebe.

Waxaa laga soo wariyey Abii Hureyra Ilaah ha ka raalli noqdee in uu Nebigu NNKHA yiri;

(اياكم والظن فأن الظن أكذب الحديث ولاتحسسوا ولاتجسسوا ولاتنافسوا ولاتحاسدوا ولاتباغضوا ولاتدابرا وكونوا عباد الله اخوانا كماأمركم) البخاري.

(War hooy iska jira malaha, waayo maluhu waa kan war la sheego ugu beenta badane, Ha is jaajuusina, Ha

is qod qodina, Ha looltamina (ficiltamina), Ha is xasdina, Ha isku xanaaqina, Ha isu dhabar jeedinina (kala caroonina), ee ahaada addoomo Ilaahay oo walaalo ah sidii la idin amray) W.W; Bukhaari.

Haddaba Eebe sareeye wuxuu ugu baaqay ama amar buuxaba ku siiyey addoomadiisa in aysan ka shaqayn oo ku mashquulin waxyaalahaas laga yaabo in ay ku dhaliyaan iska horimaadyada iyo xurgufaha hurgumiya boogaha qabyaaladeed, laakiin ay baddelaan wejigaas foosha xun oo ku mashquulaan isku kaalmaysiga kheyrka iyo sama falka, wuxuuna yiri;

2.المائدة (وتعاونوا علي البروالتقوي ولاتعاونوا علي الاثم والعدوان)

(Isugu kaalmeeya samaha iyo dhawrsiga hana isugu kaalmaynina dambi iyo colnimo,) Al-maa'idda:2.

Sidaa sida ka soo horjeedkeeda laakiin abaal marin ahaan ku waafaqsani waxa ay tahay in hadduu qofkeen qof kale ugu gargaaro dambiga dilka, si kastaba kaalmadiisu ha ahaatee waxa uu si aan muran lahayn ula qaybsanayaa dambiga uu galay gacan ku dhiig lahaasi. Ilaahay baa taasna noo caddeeyey oo waa tuu Nebiguusu yiri;

(من أعان علي قتل مؤمن ولو بشطر كلمة ياتي يوم القيامة وهو مكتوب بين عينيه يائس من رحمة الله) .

(Ku kaste kii ku kaalmeeya, gacan ka geysta, dil ruux Eebbe rumeeyey wuxuu imaanayaa maalinta qiyaamaha iyada oo ay labada indhood dhexdooda, wejiga, uga qoran tahay" kani waa mid ka quustay naxariistii Alle).

Wuxuu kale oo Ilaah tusay in ay isku mid yihiin isku meelna laga wada abuuray, ayna ku siman yihiin shaqa walba iyo wax walbana ay ku siman yihiin, tusaale carabtii Qureysh iyo kuwii kale ee isla weynaa ee ka faani jiray in ay maraan halkay dadyowga kale marayaan marka la xajinayo ayuu Ilaah ku canaantay taas oo ku yiri;

(ثم أفيضوا من حيث أفاض الناس واستغفروا الله ان الله غفور رحيم) البقرة:199.

(Oo Markaas ka gaddooma meeshay dadku ka gaddoomaan, dambi dhaafna weydiista Eebe, Ilaahay waa dambi dhaafe naxariiste ehe.) Al-Baqra:199.

Markaasuu weliba sii sheegay in uu isagu ugu xisaabinayo xagga ajirrada iyo abaal marinada qof walba in waafaqsan wax tarkiisa sida uu dambiyadaba

ugu eegayo hadba intuu qofku geystay, isaga oo aan ninna ku sharfayn karaamo dheeriya oo uu lahaa iyo cid uu ka soo jeedo toona, oo wuxuu yiri;

(ومن يعمل من الصالحات من ذكر أو أنثي وهو مؤمن فأولئك يدخلون الجنة ولايظلمون نقيرا) النساء:124.

(Ruuxii fala wanaag lab ahaayaa ama dheddig ahaayaaba isaga oo rumaysan (xaqqa) kuwaasi waxay gelayaan jannada lagamana dulminayo Atam (qurubka ugu yar ee maatarka oo sama falkoodii ah).An-nisaa:124.

Intaas ka dibna Ilaah wuxuu ugu baaqay midnimo iyo wada jir walaaltinimo ku dhisan, iyada oo laga tix raacayo qiritaanka la qiro jiritaanka Allaha keliya (Tawxiid), oo wuxuu yiri;

واعتصموا بحبل الله جميعا ولاتفرقوا واذكروا نعمت الله عليكم اذكنتم) أعداء فألف بين قلوبكم فأصبحتم بنعمته اخوانا وكنتم علي شفاحفرة من العمران (النار فأنقذكم منها كذلك يبين الله لكم اياته لعلكم تهتدون:103

(Qabsada xarigga Eebe (Islaamka) dhammaantiin, hana kala tegina xusana nicmada Eebe ee korkiina ah markaad colka ahaydeene uu isukiin dumay quluubtiinna oo aad noqoteen nicmada Eebe darteed walaalo, idinkoo bohol naar ah qarka u saarnaa oo uu idinka koriyey xaggeeda , saasuu idiinku caddaynayaa Eebbe Aayaadkiisii waa intaasoo aad hanuuntaane):Al-cimraan:103.

mar kalena wuxuu yiri;

الحجرات (انما المؤمنون اخوة فأصلحوا بين أخويكم):10

(Mu'miniintu waa uun walaalo ee wanaajiya walaalihiin dhexdooda) Al-Xujraat:10.

mar kalena wuxuu yiri;

(وان هذه أمتكم أمة واحدة وأناربكم فاتقون)المؤمنون:52.

(Oo runtii ummaddiinani waxaad isku tihiin ummad keliya (walaaltinimadiina), anna waxaan ahay rabbigiin ee iga baqa) Mu'minun;52.

Ka dib markuu Ilaahay ummaddaan tusay oo baray walaalnimadooda iyo xiriiradooda aan kala go'i karin oo ay u bislaadeen heer ay ka takhalusi karaan qabyaalad ayuu Eebe weyne, wax walba oge, uga digay in ay ku dhaqaaqaan fal qabyaaladeed iyo eex , wuxuuna yiri;

(ياءيها الناس اناخلقناكم من ذكر وأنثي وجعلناكم شعوبا وقبائل لتعارفوا ان اكرمكم عند الله اتقاكم ان الله عليم خبير)الحجرات:13.

)Dadow-Dadoow waxaan idinka abuurnay lab iyo dhedig, waxaanna idinka dhignay shucuub iyo qabiilooyin si aad isu aqoonsataan, ruuxase idinkugu sharaf badan Eebe agtiisa waa ka idiinku dhawrsasho badan, Eebana wax walba waa ogyahay) Al-xujrat:13.

Nebi Maxmmed NNKHA oo in badan ka dayriyey cudurka qabyaaladda iyo khatarta uu u leeyahay bulshada haddii uu soo dhex galo ayaa yiri;

(ليس منا ,ليس منا من قاتل علي عصبية ,ليس منا من دعا الي عصبية من مات علي عصبية)

(Naga mid ma ahan kii u yeerta (ku habarwacda) qabyaalad, Naga mid ma ahan kii ku dagaallama qabyaalad, naga mid ma ahan kii ku dhinta qabyaalad), wuxuu kale oo yiri nebigu;

(كلكم من أدم و أدم من تراب)

(Waxaad dhammaantiin tihiin ilmo Aadan, Aadanna dhoobuu ka yimid), ee ha dhamaato dadka ku faana Aabayaashood haddii kale Ilaah waad uga liidan doontaan dibi yar ama (weyl).

Saqda dhexe habeenkii ayuu Nebigu la kacay Ilaah bari markaasaa waxaa hadaladiisii ka mid ahaa; (waxaan Ilaahow ka marag kacayaa in addoomadaada oo dhan dhammaantood ay walaalo yihiin),

Wuxuu Nebigu shaaca ka qaaday in haddii laba qabiil oo muslimiin ihi ay dagaal foodda is daraan oo islaayaan ay guud ahaanba dadka labada dhan ka kala dhintay noqonayaan wada Ahlu naar, markaasaa la weydiiyey oo Nebi Allow kan wax dilay la garayee maskiinka la dilayna maxaa loo raacanayaa? suuye Miyuusan isba u socon oo rabin dilka walaalkiis?,

wuxuu kale oo sheegay in kii ku dhinta qabyaalad awgeed uu dhintay dhimasho jaahiliyeed.

Maxaa yeelay waxaa Ilaahay caddeeyey in ay guud ahaanba Muslimiinta ama mu'miniintu isu yihiin walaalo isku dhaata oo aan kala go'in, oo Ilaah waxa uu yiri;

الحجرات (أنماالمؤمنون اخوة فأصلحوا بين أخويكم):10

(Mu'miniintu waa uun walaalo, ee wanaajiya walaalihiin dhexdooda) Al-xujraat;10. Nebiga NNKHA isna arintaa ayuu sii sharaxay oo wuxuu yiri;

(مثل المؤمنين في توادهم وتراحمهم كمثل الجسد الواحد اذا اشتكي عضو منه تداعي له سائر الجسد بالحمي والسهر)

(Masalka is jacaylka iyo isu naxariisashada Mu'miniintu waa sidii hal jir oo kale oo hadday xubini xanuunsato uu dhammaanba jirku wada dareemayo xummad iyo soo jeed).

Maalin maalmaha ka mid ah ayaa munaafaqii weynaa ee la oran jiray C/llahi Bin ubaya Bin salool u diray nin gabyaa ah si uu isugu soo diro qabiilladii Carbeed ee horay isu layn jiray,

Markaasuu ninkii intuu dhex tagay dadkii oo isku dhex jira oo walaalo ah ku dhex furay sheeko ku saabsan dagaalladoodii hore iyo xurgufihii dhex oolli jiray sidaas ayuuna qolo walba ugu abuuray cuqdad qolada kale, ilaa ay bilaabeen inay is dhahaan;

Anagaa idinkaga raynay waagii dagaal hebel, wallee waxaan idinku dhignay waaba la ogaa, iwm, taas oo ugu dambaystii gaartay hadda noo soo baxa iyo hadda noo soo baxa, ka dib arintii waa weynaatay wuxuuna hadalkii gaaray Nebigii, markaas buu soo baxay isaga oo xanaaq fidh la ah oo indhihii guduuteen kuna qayliyey;

(أبدعو الجاهلية وأنا بين أظهركم)

(waar ma hadaad habarwacashadii jaahiliyadda gasheen anoo idin dul taagan?), wuuna sii kululeeyey hadalkii isaga oo carrab adkaystay canaan dheer oo ay ka mid ahayeen erayadeedii;

(دعوها فانها منتنة)

(Waar isaga taga qabyaaladda waa wax qurun xun ehe)

Nebigu wuxuu ku tilmaamay qabyaaladda Maydnimo (bakhti) iyo qurun loo baahan yahay in uu ruuxa Aadanuhu ka gil-gisho.

Geban gabo; Qabyaaladda waa lagu cillobaa, qabyaaladda waa lagu cuuryaamaa, qabyaaladda waa lagu caruur waayaa, qabyaaladda waa lagu cirib tirmaa, cillad weeye baas oo waabaa la wad wadi jiray.

SIDAY KU DHAMAATAY QABYAALADDII CARBEED

Waxay Khaliijka Carbeed gudcur aan cawa weera lahayn ku dhex meeraysataba, waxay badawiyiintii carra qasaanba, waxay cidiba cid cuntaba, waxay dooxashadu daruuro lagu faano ahaataba, waxay dirirtu sii fogaataba, waxay dan yartu murugsanaataba, waxay da'yartu dacdarraysnaataba, Daa'in Eebbaa hogol u onkodiyoo dayax nuuraya oo diinta Islaamka ah u soo ban dhigay.

Isu daacadnimo, isu ducayn, is addeecid iyo is dagaal la'aan bayna dabadeed ku daa'imeen noloshoodii, tan iyo intay dib kaga soo noqotay qabyaaladdii iyo jaahiliyaddii, hase ahaatee

biliglaynta nuurka yar ee ay diinta ka haystaan awgeed ayaad ku arakaysaa maanta dahabka iyo dheemanka ay la ciirayso carradoodu ee dunida oo dhan looga soo shaqa doonto. waxaana hubaal ah oo in badan la arkay in kol kaste oo uu ka nuxuuso iftiinkaasi ay gudcur habeenaad hor leh gelayaan, ka soo horjeed ahaan markii ay bidhaantaasi u sii bilig tiraahdaba ay sii dhadhaminayaan nimcooyin hor leh oo aysan horay u filanayn, kuna noqota waa beryow walalac.

Aan ku weydiiyee akhristow hadaad damacdo in aad beer ka falato dhul hawd iyo jiq ah ee ay baararka isla dhaafeen guud ahaanba noocyada dhirta dhaadheeri, hoosna ay kash kaash ahaan ugu bilkaxan yihiin kaxandhada iyo qodaxdu maxaad shaqo ka bilaabi lahayd sow in aad horta dhulkaas oo

dhan sifaysid oo aad ka dhigtid geed aad gubto iyo geed aad gooyso ma ahan?, aadna weliba hadaad doonto aad reebatid qaarka aad uga faa'iidaysan kartid harka iwm,?

Haddaba si geed qaadkaas lamid ah ayuu Eebe weyne hadduu rabo in uu ardi dadkiis baraare iyo wanaag u dhaliyo xaarinka ku haadiyaa oo buunshe bixiyaa marka hore, oo bal eeg inaguba hadduu geedka cinabku inoo bixi waayo waan goynaa oo halkiisii ku beernaa mid kale, ilaahna wuxuu yiri;

(وان تتولوا يستبدل قوما غيركم ثم لايكونوا أمثالكم) محمد:38.

(Hadaad xaqqa ka jeedsataanse wuxuu Eebe idinku baddelayaa kuwa kale oon idin la mid noqon doonin) Muxammed :38.

Haddaba runtii qoladii Carbeed iyo quruumo kale oo fara badanba waxay noqdeen kuwo ay tani ku dhacdo, dhanka kale markaan ka eegnana waxay ahaayeen kuwa uu Ilaahay la doonay kheyr iyo barwaaqo suu wuxuu badbaadiyey jiilalkoodii dambe ee uu iyagii ku beddelay. Sidaa darteed arrintu ma ahan in ay wanaagga dambe isla kuwani mar kale dhadhaminayaan ee waxay tahay in ubadkoodu u baxsanayaan miraha wanaagga oo ay noqonayaan kuwii lagu baddelay.

Xikmaduna waxay tahay si loo garto samaha waa in la bartaa xumaha, maxaa yeelay ka dib markay is jafayeen in ka badan kontomeeyo sano ee ay naf iyo dhaqaalaba ka quusteen ayna waayeen si Alle iyo si ay isaga xalliyaan dhibkaas, unbuu Ilaah soo dhex dhigay xalkii iyo dawadoodii markaas ayey iyaga oo

u hilowsan u gacmo hoorsadeen illeen waa dad dhib taabtaye, waana middaas midda maanta ina tusi karta in ay dadka soomaaliyeed yihiin kuwa Ilaahay la doonay kheyr iyo barwaaqo ayna u curatay daruur caafimaad oo ay ku darari doonaan, waase hadday gartaan oo maalaan.

Calaamadaha ama astaamaha aad ku garan kartidna waxaa ka mid ah sida uu Ilaah dadkii ugu kala shaandheeyey dagaalladan, tiiyoo uu qof walba la soo baxay wixii qalbiga uga jiray haday shar ahaayeen iyo haday kheyr ahaayeenba, si taa la mid ah waxaad arkaysaa in kuwa fidna wadayaasha ah ee hogaamiya dilka iyo bililiqada ay tarab tarab ugu le'anayaan si silic iyo saxariir ah, halka ay qaar ka mid ihina ka soo hanuunayaan oo danohooda dib ka soo garanayaan,.

Haddaan u soo noqono ujeedada qoraalkeena ma is weydiin karnaa sideebuu u beddelay Islaamku dadkii ku noolaa xayaatada yeynimada iyo uubatonimada ahayd ? runtii waxay ku dambeeyeen kuwa kulligood isugu yeera; (walaalle) iwm, taas oo gaarsiisay in ay inta laba laba u walaaloobaan wadaagaan wax kaste, waxay kala goosan jireen cad rooti ah, koobka biyaha ahna wey isla kabbanayeen, iyada oo laga yaabo in ayba labadaa walaaloobaysaa ka kala yimaadeen laba qabiil oo weligood is rifi jiray, bal aan iminka tusaale u soo qadano saddex nin oo walaalowday, kana kala yimid saddex dal oo kala fog-fog haddii laga eego dhan walba xag; masaafo, dhaqan, dhaqaale iwm; waxayna kala ahaayeen;

Salmaan oo reer Faaris ahaa, Bilaal oo Xabashi ahaa, iyo Suheyb oo reer Ruum ahaa, saddexdaas nini

waxay u walaaloobeen sidii in ay isku aabbe iyo isku hooyo yihiin, sidoo kale Muhaajiriin iyo Ansaar oo dhan labo labo ayey u walaaloobeen oo nin kaste oo Ansaar ihi wuxuu kala baray xoolihiisii iyo hantidiisii oo dhan haduu laba xaas lahaana mid furay oo isla markiiba ku wada wareejiyey Muhaajirkii la walaaloobay.

Cutubka Saddexaad.

MAXAA NALOO CADAABAYAA?.

WAA MAXAY CADAABKU?

Si aannu u garano waxa u dhexeeya cadaab iyo cadaab la'aan waxaa habboon in dhudhumino bal inta uu inoo jiro cadaabku iyo guud ahaanba aragtida cadaabku waxa ay ku salaysan tahay. Waxaa la arkaa in aanu had iyo gooraale akhrinmayno Qur'aanka, nasiib darase aanaan ka kororsanayn wax caqli iyo cilmi lagu waano qaato ah, taasina waa cillad xun oo cirib go'eennu uu cuskan karo.

Inta badanba cilladaas Qur'aan faham li'ida ahna waxaa u hooyo ah tiiyoo uu akhriyuhu ku salaynayo fikirkiisa iyo fahamkiisaba qisada iyo dhacdooyinka la yaabka leh ee uu meesha ka fahmayo uun, waxaana dhacaysa in uu ka qaado yaab laba aftuur ah oo haddii la weydiiyo mira dhalkii uu ka faa'iidaystay uusan wax jawaab ah u haynin, maxaa yeelay waxa uu intuu wax akhrinayey ku fikirayey sida ay oraahyadu isugu habaysan yihiin iyo qoladii ay wax ku dheceen dullinimadooda,

Wuxuuna iska sawiranayaa xaalladdii ay wax ku dheceen oo uu ka soo qaadayo in ay ahayd xaalad jaahilnimo iyo halkii ama qoladii ay wax ku dheceen oo uu iyagana ka soo qaadayo cawaan wax ma garato ahayd.

Haddaba si aan fikirkeennu intaa oo keli ah ugu soo gaaban ee uu inoo danqiyo waxaa lagama maarmaan ah in qofkeen marka uu Qur'aanka akhrinayo, sida Aayadaha cibra qaadshadu ay ku jirto, uu ku salaeeeyo fikirkiisa isla naftiisa, isla markaasna uu isla barbar dhigo waxa ku jira naftiisa iyo hawadiisa, iyo waxa dhex yiilay qoladaas uu ku cibra qaadanayo, iyo weliba hab dhaca iyo ujeeddada uu Eebbe weyne kaga dan leeyahay hadalkiisaas.

Intaa marka uu isku aruursadana akhristuhu ha u tafa xayto siduu isaga baddeli lahaa dhammaanba caadooyinka xun xun ee markaa iyo mar ka horeysay intaba faraha kula jiray.

Aragtidaasna waxaannu ku salaynaynaa xagga Islaamka iyo taariikhda waaqiciga ah ee la saan qaadaysa nolosheenna.

Haddaba cadaabyada, halaagyada iyo fitanta Eebbe nooga digayo oo nagu waaninayo in aan iska jirno wax meel dheer naga jira maahan ee mar Alle iyo markuu Eebbe damco ayuu nagu tuuri karaa iyadoo ku dhisan hadba saan u mutaysano iyo saan ugu bislaano,

Mana ahan cadaabku wax si kale ah oon la qiyaasi karine waxaa ka mid ah isla noocyada iminkaba nagu dhaca, inkastoo aanaan dhug u lahayn, waxna ka dhiganin ka dib markay na soo kareen. Oo waxaaba ka mid ah abaaraha iyo cudurada noo caadiyoobay bal arag Ilaah oo Quraankiisa ku lah;

أولايرون أنهم يفتنون في كل عام مرة أومرتين ثم لايتوبون ولاهم (يذكرون) التوبة:126.

(Miyeysan arkeyn in la fidnaynayo sannad kastaba mar ama laba jeer (doog&abaar iwm) markaasaysan hadana tawbad keenayn oo xasuusanayn) Tawbah; 126.

Haddaan si xeel dheer isugu barbar dhigno cadaabyada nagu caadiyoobay iyo kuwa Qur'aanka lagu sheegay ee qoomanka lagu halaagay bal aan qaarkood tusaale u soo qaadano sida; qayladii lagu halaagay reer Thamuut,

Qoladii reer Thamuut ee loo diray Nebi Saalix wuxuu ahaa nooca cadaabka ee lagu halaagay Koronto laba nooc kala ah ama tabane iyo togane (+

& -) ama is lis danab sida onkodka oo is xoqay, dabadeedna dhaliyey qarax iyo qaylo dhega jebiso ah oo lala maydo.

Taasina waa mid maanta kun jeer nooga dhaw siday berigii hore ahayd oo inagaaba maanta saacad walba faraha kula jirna korontadii iyo fal dambiyeedyadiiba. Si aan dhaqso ugu sii fahamno aan tusaalooyin kale u soo qaadano qaar ka dhacay isla dalkeena gudihiisa sida;

Waxaa in badan na sal kiciya daadad lixaad leh oo tusaale dhab ah inaga siin kara daadadkii lagu halaagay Qoonkii Nebi Nuux, waxayna qaarkood nagu leeyihiin taariikho iyo xusuuso sida;

Kuwii harqiyey Siyelow 1916 kii iyo kuwii maasheeyey Hiiraan labada Jubba iyo labada Shabeelle 1980 kii, cadaabkaas oo kale wuxuu ahaa in sannadkii 1890 kii roob diqsi iyo dhuug ah oo xoolihii laayey uu ku da'ay koonfurta iyo galbeedkaba dalka gaar ahaan xadka lala wadaago Kenya iyo Itoobiya, waxaana loo baxshay (sanadkii diqsiga).

Sidoo kale 1903 dii roob qiiq iyo ceeryaamo ah oo ay ka da'ay Siyelow iyo soonaheeda, isla sidaa oo kale 1880 kii roob ah dhagxaan quruuruxa ayaa ka da'ay koonfurta dalka ilaa Marsabet - Kenya oo uu ka caanbaxay. eeg; (Almanic- xusuus reebkii Ingiriiska ee waagii gumaysiga East Afrika).

1983 kii waxaa ka da'ay Shiinaha iyo waddamo kaleba roob cagaaran oo dilaa ah ilaa maantana la bixin la'yahay macnihiisa.

Dhab ahaantii wax aan qoraalkan iyo ku kale toona ku koobi karno maahan ee waxaa is weydiin leh maxay dadkeenu u garan la'yihiin oo u dareemi la'yihiin jawaabta su'ashan aan bal sii baarno.

FADARANIMADEENII.

Waxaan hadal iyo qoraal toona ku soo koobi karno maahan inta aan dambi galnay, inta aan danbiyo gacanteenna ku kasabanay, waxaan galabsanay waxaan la arag oo la maqal, dhabtii way ku yartahay soo maritaanka taariikhda Aadanaha mid lagu matali karo middii nagu dhacday iyo middii aan kasbanay labaduba.

Si kastaba ha ahaadeene akhristow taas Allaha na illowsiiyo ee aan ka aamusno waayo waa wax ku wada culus sheegga qaarkood waa waxaan lagu

laaban karin, qaarkood aan la ogeyn ama la hubin karin, qaarkood la aqbali karin, qaarkood la raad raaci karin, qaarkood la fahmi karin, qaarkood lagu dhiirran karin sheeggooda.

Akhristow waxaan caadaysanay; been, xan, xaqdi, xaasidnimo, xin, ballan darro, iimaan darro, sed buursi, isku dul noolaansho, is addoonsiga, is yaska, isla saraynta, cibaado Eebe cid kale u weecinta, cibaado la'ida ama cibaado yarida, dhuuniraacnimada, dhillaysiga, dilka, dhaca, boobka, bililiqada, miisaan khafiifinta, caddaalad darrada, ceeb raadiska, iyo qurunka qabyaaladda.

Intii ay doonaanba ha la ekaadeene akhristow sow ma habboona in aan wax yar oo tusaale ah ka caddayno caadooyinkeennii fal-fal xumada ahaa? si

aan dhab ugu caddayno waxa jiray, waaba intaas oo aan ka soo noqonnaaye ka dib markaan aqoonsanno waxay samo iyo xumo leeyihiin ficilladeenu.

CIBAADO

QALLOOCINTA

Inkastoo dadkeenu yahay dad aan marnaba ogolayn in xuntooda la sheego, oo loo maleeyo in ay aaminsan yihiin inay iyagu yihiin Shariifyo aynan marnaba xumaani ka dhici karin, sidaa darteed ay ceeb culus u arkaan in lagu sheego xumaanihii horay u dhacay oo ay ka dhigayaan marka xumahoodu caddaado in aysan iyagu wax lug ahba ku lahayn.

Waxaad arkaysaa in qofkeen marka uu akhrinayo ama ku tadaburayo oo uu dhab ahaan ugu fiirsanayo

qaar ka mid ah Aayadaha cibra qaadashada ee Qur'aaniga ah uu ku salaynayo fikirkiisa iyo fiiradiisaba dadyowgii hore iyo kuwa ay Aayaddu markaas xusayso magacooda, isaga oo aan marnaba meesha soo dhiganayn naftiisa iyo cimilada uu ku nool yahay waqtigaas la joogo.

Taasina ay markaa gaarsiiso in uu isu arko mid isagu ka weyn kana dahiran xumaanahaas la sheegayo, haddana ogeysiis ahaan loogu soo gudbinayo isaga wixii dhacay. Hadana saas oo ay tahay bal aan ku sheegno walxaha qaarkood kuwooda ugu caansan oo waxaaba ka mid ah; qodobka aan cinwaansanay ee ah in cibaadada Eebbe cid kale loo wareejiyo ama lala wadaajiyo si kas ah iyo si kama' ah intaba, isla goortaasna lagu doodo mu'minimo iyo mukhlisnimo.

Dhab ahaantii Soomaaliya weligeedba waxay ahayd xarunta shirkiga iyo Ilaahyada been abuurka ah, sida ay duniduba u badan tahay ilaa laga gaaray xad lagu faaniyo Dhulkii Ilaahyada, Dhulkii udugga ama bukhuurka iyo kuwa la mid ah oo loogu baxshay ku caan bixidda Sanamya yarowyada iyo waxyaalo ka mid ah qalabka loo adeegsado ku cibaadaysigooda, sida; Fooxa, Bukhuurka, iyo khilaawaynta.

Inkastoose ay taasi gaban gabo gashay oo ay Diinta Islaamku caad saartay, hadana weli waxaa caado ahayd in la isku qadariyo oo lagu tartamo sida loogu kala horeeyo leexinta cibaadada Eebbe loo leexinayo xag; qabuuro, awliyo beenaad, dad saalixiin ahaa, iyo qabiil hebel. si kastaba taasi ha ku timaaddee waxay ka dhacaysay waayadii dambe dadkeenna intiisa badan.

Si aan u sii faah-faahinno waxaa ila quman in aan tusaale u soo qabsado wixii ka jiray goobtaan ka war hayo ee aan ku soo koray Muqdisho ee cibaado marin habaabin ahaa; siiba keliya xeebta gaaban ee ku dhirirsan Degmada Marka ilaa Degmada Kaaraan.

D/Marka waxaa si toos ah uga dhaqan galay in loo tiiriyo cibaado xafladda la yiraaho; Aw-cusmaan oo loogu cibaadaysto hab faaxisho iyo zino samayn ah (aw Cusmaan iwm), haddii xeebtaas xagga Muqdisho loogu sii dhaqaaqo waxaa laga helayaa dhawr mitir ka dibba qabri ama shey la arko humaaggiisa iyo mid aan la arag intaba oo lagu gawriiro habeen iyo maalinba.

Sida meelaha; Gandershe, Xalane, Jasiira iyo baadiyaha la simanba, kuwaas oo loogu soo duwo ummadda si indha sarcaad ah, weli hadaad ku sii socoto xeebtaas ilaa aad ka gaarto Muqdisho waxaad arkaysaa Aw-muraad, oo ku dhex yaalla xeebta geel laqe, lana weydiisto in uu arimaha fududeeyo, ama muraadka sahlo, wax yar hadaad sii tallaabsatana waxaad helaysaa Istaaqfurulow oo laga codsado in uu joojiyo kacdoonka dabaylaha Mansuunka, iyada oo xilligeeda la muujiyo damaashaad ciideed.

In yar sii dhaqaaq waxaad ku arkaysaa ka soo hojeedka D/shangani dhagax la qoray ama loo ekaysiiyey xubinta taranka ee ragga (gus). Kaas oo ay u baryo doonashadiisa iyo dhunkashadiisa dhediggu u badan yihiin iyada oo waxyaalaha ugu weyn ee laga codsadana ay ka midka yihiin; in uu u

hibeeyo Awlaad kuwa dhali waayey, in uu u kala qoro wiil ama gabar, in uu u sahlo seey (xaas) kuwa lamaannaha waayey ee guumaysoobay, in uu dhaafo dambiga zinada oo kuwa ka ganacsada jirkooda ayaa deris la ah, todobaad walbana siyaarta oo laaluush siiya. Caqiidada jaadkan ihina waxay ka soo fushay markii hore dalka Hindiya oo qolo degani ay xubintaas ku caabudaan.

Weli sii soco ilaa aad ka gaarto halkaan ku ballannay waxaa kaa soo horbaxaya taallada C/casiis oo haddii ilmo ku dhashay aaggaas aan loo geyn oo aan sharad looga soo xirin ama aan tahliil looga soo tufin uu noqonayo mid aan lagu rajo weyneyn oo loo arkayo ilmo aan qumanayn kuna dambayn doonna caaqiba xumo ah dulli iyo dac darro, iyada oo aan lagaba sugeyn waxtar.

Intaas ayaan uga gaabsan karnaa tusaalaha cibaada qalloocinta ee ay bulshadeennu qabatimeen, waxaana la hubaa in guud ahaanba gobolada dalka ay qurunsadeen Sanam yarawyada noocan ihi, welibana ay intooda badani ka badsadaan halka aan tusaalaysanay, maxaa yeelay goobta aan xusnay waa tii ay ku noolaayeen waqtigaas dadka ku horeeyey ilbaxnimada iyo tacliintu, sidaa darteed la xaqiijin karo in ay ka gaabsadaan waxyaalo kale oo ay ceebahoodu bannaanka yaalliin.

Tan ugu daran ee Soomaali rogtayna waxaa laga wada marag yahay in ay tahay uun Qabyaaladda indho la'aanta ah, oo ah iyadu midda ka dambaysa fal-fal xumooyinka intooda badan ha ahaato dambi Alle

laga galo ama mid Aadane laga galo, tusaale xagga shirkiga;

Qolo walba waxay gaarsiiyaan qiimaynta qabiilka heer cibaado, qolo walba waxay u gawracaan oo wax weydiistaan mid ay u tiirinayaan in uu magaca qabiilkoodu ka yimid, qolo walba waxaa u jooga mid habaabiya oo u sheegta Ilaahnimo been ah sida; Abaa ruuxa iwm, oo ballan qaada in uusan Jannada galayn ilaa uu ka buuxsho qabiilkiisa, qolo walba waxay leedahay goob ama shey ku salaysan qabiilka oo la taageero weydiisto sida;geedka Lisaan oo usha la surto marka la duulayo (Thaata anwaadh) iyo Yaxye iyo Moorif.

Mid kale oo weyn ahna nooc lagu mutaystay ciqaab waa iimaan darrada iyo ku kufrinta nicmada

Eebbe oo sal u noqonaysa xumaanaha badankooda waxayna taasi u dhacdaa sidaan oo kale;

Waxaad ka soo hor baxaysaa nin Alle u nicmeeyey markaasuu kaala hor imaanayaa markaad tiraaho; war iska warran?, wallaahi waa la yaaban yahay, waa la wareeray, iyo erayo dayreedyo kale waxaana laga yaabaa in uu kuugu sii tilmaamo xoolihiisa war Markabkoo yar oo badeeco qiima leh aan qaadinin baan cidda biilka uga raadiyaa.

Ugu dambaystiina labadii sheekaysanaysay ayaa la arkaa in ay iyaga oo ballan beenaad ay ku kala tegayaan dhiganaya is yiraahaan; war hadde Hebelow ha lagu arko, xageebaad fariisataa adigu?(ku khayishaa), aan Habeen dambe meel hebla isugu

imaanno iwm, midkoodna kuma imanayo ballantaas oo markii horaaba nin walba ogaa in ay been tahay.

Runtii maahan wax aan marnaba wax la sheego ka xusi karno dhaqan xumadaas ay dadkeenu caadaysteen ee lagu kasban karay ciqaabta iyo cadaabka ee waxaan ku leeyahay waxaan ku dhaqannaa wax walba oo lagu dhaqmi jiray waagii jaahiliyadda weliba wax walba waan sii casriyeynay oo waxaanu u wada yeelnay wasaarado, hay'ado, maamullo, iyo magac sharfeedyo la weyneeyo, sida;

Isticmaalka ribada, dhaca, khayaanada, beenta, boobka, dhillaysiga, qabiilaysiga iyo sharci darro ku goynta naf Alle isu dhiibtay oo uu raalli ka noqday, haba ahaato tani mid ay ummadaha dunida oo dhami

ay maanta nala wadaagaan ee waxaanu nahay kuwa haatan ku haftay.

Waxay dhallin yaradeena jiilkan joogta ka markhaati yihiin in aan soo marnay xilli aan ku faanno daroogada sida qaadka iyo Khamriga, dhillaysiga, dilka, iyo xumaano kale oo badanba, waxay qaawanaanta gabdheheenu soo gaartay heer la isugu tilmaamo (yartii kastuuma guduudda ahayd, googarada cadayd iwm).

Wuxuu maamulkeennu soo mariyey tarbiyadeenii heer aysan gabadhu gooni ama gabar kale ag fariisan karin marka fasalka wax barasho la joogo ee ay ku qasban tahay in ay kala dhex fariisato laba wiil iyada oo qaawan (qabta shaar gacmo gaab ah oo

badhamadu u furan yihiin, surwaal aad ugu dhegan, iyo tima qaawan),

Waxaan soo marnay iyada oo ninku uusan raganimo dareemayn kol haduunan soo dilin nin reer hebel ah, isticmaalinna wax ka mid ah noocyada maandooriyeyaalka ah. waxaa intaa inoo sii dheeraa jaahilnimo axmaqnimo ah, oo waxaan ka indha saabnayn waxa jira arlada, waxaannu ahayn war laaweyaal aan loo warramin una haysta in aan war ka maqnayn.

Akhristow miyaad weligaa u fiirsatay wixii ka taagnaa dalkeenna siiba meelaha muhiimka ah ee la isugu imaan jiray, ama la soo ballayn jiray marka baaddiyaha laga yimaado sida barxadda Ceelgaab ee Muqdisho, ee ahaa fisqi iyo jahilnimo gaar ahaan

sanadihii todobaatameeyadii ilaa iyo bilowgii sideetameeyadii. waxaa ka mid ah waxyaalaha jaahilnimo iyo badawnimo ee ay mudantahay in aan ka yaq yaqsiyoonno marka aan soo xasuusanno qaar ka mid ah calaamadihii iyo labisyadii aan ku faani jirnay innaga oon ka war qabin halka ay salka ku hayaan sida;

Calaamaddii aan ku dhigan jirnay Farmashiyeyaasha ee ahayd (Payer oo isku tallaab ah), taas oo ahayd calaamadda shirkad soo saarta Asprine, oo Kiristaan ah qasdigeeduna yahay qiimayn Kiristaan, isla markaasna calaamaddu ay mar kale tahay astaanta Kiristaanka ee ka tarjumaysa isku tallaabtii lagu qodbay Ciise Masiix, arrintaas oo ah been iyo mala awaal.

Waxaa kale oo ka mid ah astaanta aan ku dhigan jirnay kaallimaha shidaalka ee Agip, taas oo iyana ah calaamad shirkad shidaal oo gaalla ah, taas oo aan wax war ah u hayn in aan faaninayno mageceedii iyo in kale, ee aan ugu shaqaynaynay si jinni kugu shaqaysay ah oon ciduna noo dirsan iyo kuwa kale oo aanaan hadda halkaan ku koobi karin.

Waxaa laga yaabaa in qofkeen is weydiiyo fisqiga maanta jira ee ka socda dacallada dunida keligeen ma wadnee maxaa innaga lanoo kugu gooni yeelayaa ciqaabka?, taasna jawaabteedu waxay tahay; inkastoo dad badani nala qabaan ama naga badiyaan xumaanahaas hadana innaga unbay maanta na haysataa natiijadeedu ee aan isku dayno sidaan uga gil gilan lahayn fallaarta inagu dhegtay, iyada oo uu

nin walba filanayey, waase haddaan ku cibri qaadanayno,

Mar horaan wax ku qaadan weynay wacdigii culimada, oo wax ku qaadan weynay wacdaraha adduunka ee maalin walba aan sheeko iyo shaahidba ku helayno, dhegaheenna iyo dhaayeheenana ka buuxsamay, ilaa haddana waxba kuma aanaan qaadan xataa markuu Ilaah innagii qudheenii nagu sameeyey tusaalihii iyo cibri qaadashadii oo weli waan ku sii indha cadnahay xumihii balse maba aannu garan in aan ciqaab iyo cadaab ku jirno, Allow ur noo bixi. tani wey na sidataa waxaananse garanayn halka ay na gaarsiin, kolley iyo kolleyse waxaas aan galnay oo dhan waa wax la iska gudayo oo ficil kaste oo aadanuhu sameeyo labada buug unbuu mid gelin.

FOOLXUMOOYINKII KHARAARAA EE WAAYADII DAGAALLADA.

Fool xumo iyo waxshinimo tii ugu xumayd, ugu qaraarayd, ugu naxdinta badnayd, ugu calool xumada badnayd, ugu ciribta xumayd uguna cadaabka badnayd baa ka dhacay dalka mudadii ay dagaalladii wuxuushnimada ahaa ka socdeen.

Inkastooynanba ila ahayn wax habboon ka sheekaynteedu bal hadana aan wax yar oo kuwa ugu caadisan ah ka xuso waa intaasoo ay jiilalkeena dambe ku cibri qaataane, sababta oo ah waa inaanu

aayad u noqonaa kuwa naga dambeeya kol haddaanu marin habawnay, siday inagaba aayad noogu ahaayeen kuwii naga sii horeeyey. Haddaba kuwani waa dhawr qiso oo gaagaaban kana mid ah kuwii ka caadiyoobay gudaha dalka;

1- 7 cisho ayuu dagaalku ka hurayaa magaala madaxdii, niman uusan aragoodu caadi ahayn oo marka la arko naxdin lala suuxi karo ayaa qabsaday laba gabdhood oo ay nimcadu ka dhalaalayso wejiyadooda, ahna qiyaastii kuwa aan ka soo bixi jirin gurigooda, markaasay weydiiyeen qoladooda. waxayse si bareer ah ugu sheegeen inay ka dhasheen laba qoloo ayba nimanku u ciil cunsnaayeen .

Inta faraxad jeegaanta lala noqday oo lagu yara kajamay ayaa lagu yiri; tan horta dhiigeedaa nuurayee

ciidamada dhiig halooga miiro, waxuuna qolofkeedii ka mid noqday boqolaal kale oo inta la dhiig baxshay la tuuray.

Tii kalena waxaa lagu yiri; Naa iska la dhig, mise waaba Bikro, naa waa maxay waxani? xagee ka galaynaa? ayuu mid xanaaq fidh la ihi ku qayliyey, iyada oo baryootamaysa ayey tiri; Aboowe haddeer adigu furo, suu inta aad isu ciil kaambiyey oo sii naqsaday ku cel-celiyey; naa miyaadan sii diyaarin? oo maba ku tashanayn miyaa inay wiilashani imaanayaan? wuxuuna hadal ku soo gaban gabeeyey ka tag anaa furanayee,

Markaa ayuu inta qorigii Faalka ahaa ku abbaaray halkii la furi lahaa saddex xabadood isu raacshay kagana dhaqaaqay qalfoofkeedii halkaas. (qisadan

waxaan ka dhegaystay mar aan la hayste u ahaa kuwii falkaan sameeyey, iyaga oo dhexdooda isku xifaalaynaya kuna ceebaynaya qaybtii dambiilahaasi ka dhashay, waxayna ku eedaynayeen in uu xabbad uga qasaarshay iyo in uu naagtii quruxda badnayd iska dilay halkuu iska haysan lahaa).

2- Waxaa la igu weydiiyey Nayrobi sida ay udahaara qaadanayso qof aan saxara iyo kaadi midna ceshan karin?, hadaanse arintii sii daba raacay oo la kulmay waa todobaatan jir loo da'tiriyey (eedo meeqaad jirtaa? 70, waxba maahan 70 lee ku fuulee), gabadheedii iyo gabdhahay ayeeyada u ahayde goobta joogayna waxaa la yiri; idinku iska daawada waxa lagu falayo halkaad ka soo baxdeen.

3- waxaan Baydhabo ku arkay Masjid gudihiisa lagu kufsaday laguna dhacay dumar ku soo dhuuntay.

4- waxaan Belad-Xawo ku arkay Masjid gudihiisa qaybna lagu saxaroodo, qaybna lagu khayilayo, hortiisana ay firirsan yihiin kutubtii Qur'aanka ahayd oo ku jiro kitaabka Xadiisyada ah ee Muslim oo inta la kala rogay si kas ah loogu xaaray.

5- waxaan waraystay naag soo dishay ninkeedii iyo afar caruur ah oo ay u dhashay, ka dib markuu isna dilay walaalkeed oo reerka u biili jiray, waxayna ii sheegtay wiil dilay aabbihiis ka dib markuu waayey walaalkiisii bahda kale ahaa oo isaga hooyadiis u dilay qabiil ahaan, iyo wiil ay ilmo adeertiis u dileen in ay uga shakiyeen in laga yaabo in uu sir faafiyo

maadaama ay walaalkiis kale dhashay hooyo qabiil kale ah.

Nin naag ahaan u xaraystay gabadhii ay dhashay walaashiis hooyadiis iyo aabihiis dhaleen, kuna doodaya in uu qabo oo meher u qabanayo, maxaa yeelay waa reer hebel, iyo waxyaalo kale oo fara badan lana wada sugayo dhan walba.

6- Baadiyaha gobolada dhexe ee dalka iyo meelo ka mid ah baadiyaha khaliijka Carbeed waxaa lagu kala gadanayey Makhbiyooyinkii laga qafaashay Marka, Muqd/ iyo Barawe.

7--Taariikhdii, raadadkii iyo qoraalladii dalka ma ahan wax aan qoraal iyo qiso toona uga warami karno ee bal adba caqligaaga ku sawiro waddan dhan walba

ka dhisnaa oo soo istaagay galaan gal iyo gola banaan, ayna ku dhex hardameen Mooryaan iyo Jirri ah kuwii Ilaahay laga magan geli jiray oo weliba wax sii dheer (Allow ha nagu sallidin kuwa aan adiga kaa cabsanayn, annagana aan noo naxariisanayn), oo cawaanimana usii dheer tahay.

5- Xagga kheyraadkii iyo barwaaqooyinkii dalka ee bad iyo berriba lahaa wuxuu ahaa mid dihin oo nooc kastaa uu meel kaste ceegaago maantana waa guran iyo gabaabsi, waxaana u bililiqeeyey shisheeye afraad fara ku tiriis ah,

Ashkhaastaas iyo shirkadahaas shisheeye nooguma simin bililiqaysi iyo hanti wareegsi keliya ee waxay si xaasidnimo ah u ciribtireen kheyraadkii dalka siiba xoolihii noolaa ee bad iyo berriba mushaaxayey iyo

macdantii dhulka, waxayna baddelkoodii noogu aaseen sun iyo qashin si aad ah u waxyeellaynaya cimilada iyo deegaanka dalka, kuna reebaya ubadkeenna dambe cudurro aan la bixin karin iyo abaaro.

6- Magac, sharaf, weji, dadnimo, iyo jiritaan toona ma lahayn axadka somaliga ihi dagaalkaas ka bacdi, in lagu yiraaho qof Somali waxay ahayd ceeb iyo dhaawac weyn oo loo geystay, sidaas darteed waxaa caadiyowday in laga xishoodo oo laga xanaaqo somali baad tahay.

Marka aad marayso carrooyinka shisheeye hadaad somalinimo sheegato waa lagaa yaq-yaqsan oo lagu yasin waxaana laga yaabaa in aan wax jira lagaa soo qaadin ee hortaada wax kaste lagaga sheekaysto,

Waxaana lagama maarmaan ah in lagaa ag cararo iyada oo laga cabsanayo inaad dhac iyo boob la timaado sidaad tahay Yey waxay aragto diiranaysa. dullaysigaas kaga dhacaya banaanka soomaalida waa mid aan loo kala harin aanan loogu kala saarin shariif iyo shaydaan toona.

7- In la isku tix geliyo waxshinimada iyo waallida aan dheg la qabto lahayn, taasna waxaa u daliil ah; Caymadiid (caydiid) oo ku andacooday wax badan; hala iga dhigo Madaxweyne (waa gartiis oo waa ooman yahaye) iyada oo la igu tixgelinayo intaan dad laayey iyo intaan dad dalka ka saaray, tusaale; shirkii Addis-ababa ee 1993 kii.

Waxaa kale oo iyana tusaale fiican noqon kara shir qabiileed lagu qabtay Muq. ee ay marti geliyeen qolada Mururside oo ay matalayaan odayaal ay ka mid yihiin; Max'd Nuur c/lle oo gurigiisa shirka lagu qabtay, Siicoow, xuseen Ayaanle iyo kuwa kale. shirkaas oo ahaa mid lagu xallinayey xurguf (taasoo markii dambe qaraxday) dhextiillay H/gidir iyo Abgaal,

Waxaa ka hadlay Cawaale Qaybdiid oo ayidayey in madaxweyne laga dhigo Caydiid, waxaana ka mid ahaa daliilihiisii uu ku caddaynayey waxqabadka Caydiid; in ka dib markay Abgaal u kici waayeen dagaal xamar laga bilaabo uu faafiyey waraaqo ay ku qoran tahay (waa in la laayaa qabiilka xune Hawiyaha ducufkaa ah), uuna ku saxiixan yahay M/weyne; Max'd siyad Barre,

Ka dibna bilaabay in habeen walba dhawr nin oo Abgaal ah qudha laga jaro loogana ag cararo Koofidii Police milataro ama tesaro, sidaasuu ku kacshay Abgaale hadaba ma isaga unbaa dalka xoreeyey mise Abgaal?!!!.

8- In ay dad Soomaaliyeed ku tartameen Yuhuud sheegasho sida ay in badan ku qoreen Muq. qoraa Saciid iyo asxaabtiisa oo ku hadla codka Caydiid iyo xulafadiisa, iyaga oo mar walba sheegayey in dhibaatooyinka ugu waaweyn ee xukunkii Max'd Siyaad ku asiibay ay ka mid tahay carabnimo sheegashadu. eeg Xog-ogaal;114. iyo Beel-deeq.

Keligood ma ahan dadka Yuhuudnimada arxan biday ee waxaa jira kuwa kale oo ka sii daran ayna ka

mid yihiin qabiilka Yibraha oo iyagu ku dooday in magacooduba uu Yuhuud yahay (Hebrew).

Waxaana kuwaan ka sii daran oo iyada oo aysan muuqanin wax duruuf ah oo ku kallifi kara isku daba dhejiyey inkastoo ay iska filqeen ninka madaxweyne beeleedka isku sheegay ee la yiraahdo: Ina Ibrahim Cigaal, kaas oo Fax deg deg ah ku faafiyey Yuhuudda isaga oo gaar ahaan ugu hagaajiyey Isxaaq Raabiin (Ra'iisul-wasaaraha Yuhuudda) iyo guud ahaanba caalamka Sahyuuniyadda, taariikhdu markay ahayd: July/1995.

Fakisyadaas oo ahaa kuwa uu ugu barooranayey Yuhuud, isaga oo ka cabanaya Islaam xoog weyn leh oo lagaga cabsanayo in uu ka dillaaco geeska Afrika uuna wiiqo Yuhuudnimada Soomaaliland ee soo

jireenka ah, waxaa lagu xareeyey Network, taariikhdu markay ahayd: Dec/2/1995.

Wuxuuna sheegay in uu wadnaha farta ku hayo in ay waddamada la jaarka ah iyo kuwa aan la jaar ahayanba ee ay ka mid yihiin: Yeman, Sacuudi, Suudaan, Iraan, Libya iyo kuwa kale ay rukumada ugu aasaan Soomaaliland Muslinimo mintid ah oo khtar culus huwan, kuwaas oo weligoodba ku halgamayey sidii ay Islaamka mintidka ah ugu beeri lahaayeen shacabka Soomaaliland oo xiriir dhaqan iyo dhalasho ee horay iyo haatanba ah la lahaa shacabka Yuhuudda.

9- Waxaa dadweynihii ugu fiyoobi badnaaday kuwii waal-waalnaa tusaale;

Ibrahim Waalow wuxuu ahaa nin qac ah oo ay siyaasadi derdertay ka dib markuu ka baxay kulliyada siyaasada ee Muq. waxaanan arkay isaga oo dhex taagan laba kooxood oo dab culus is weydaarsanaya oo ku qaylinaya; shacabka Somaliyed waxaan ugu baaqaynaa inay xabbada joojiyaan oo wada hadal iyo heshiis isugu yimaadaan.!!!.

Tusaale kale waxaa kuu noqon kara markaan soo dhex galay ciidaanyo dad ah oo ku mashquulsan kala bililiqaysigii Machadkii Sidam oo nin walba uu la halgamayo bililiqaysiga iyo rarashada wuxuu jeclaa; qaar waxa keliya oo ay baaranayaan Dollar, qaarna Khamri, qaarna qalab dhismo ama guri iyo hadday tahay alaabo kaleba.

Haddaba waxaan soo galay maktabadii weynayd ee halkaas ku tiillay, ka dib markaan muddo ku dheygagsanaa silica iyo saxariirta ay ku dambaysay hantidii qaranku iyo sida ay u lumayeen qoraalladii oo dhami,

Waxaanan guda galay in aan raadsado buug aan aad u jeclaa oo aan la'aa, halkaasna mar hore la iiga diiday kaas oo markaas u ekaa in uu noqdo qaybtii aan ku lahaa bililiqadii la kala hora tobsanayey ama la kala boobayey.

Intaan ku dhex jiray maktabadii oon buugii baarayey waxaa ii soo galay nin waalnaa oo dhex jiifi jiray dukaafaddii dhismahaas hoos tiillay ama u dhaweyd oo weliba khamri si xun u sii cabay, markaasuu igu qayliyey oo igu yiri;

Walaalle ha ka qaadin kutubta halkooda waxaa u baahan walaalladaa kalee, ee intaad miiskan ku akhrisatid si hannaan wacan ah ugu celi halkaad ka qaaday, anigoo la ilmaynaya wanaagga meel beelay ee uu sheegayo ninka waalan,

Hase ahaatee aan haysan cid ka dhegaysata ayaa waxaa na soo ag maray raxan burcad qabiileed ah oo dagaal ujeed ah, waxayna damceen inay na dilaan aniga iyo ninkii waalnaa oo meeshii ku wada jira, laakiin waxay is tusiyeen inaannu nahay niman waal-waalan oo aan waxba laga faa'iidayn dilkooda, waana naga tageen. (Alleylehe iyagaa waalnaa).

Intaasi markay dhacday ayaan calool gadoomay oo ka baxay maktabaddii iskana dhaqaaqay anoon

garanayn meel aan u socdo iyo dan aan leeyahay toona, waxaanan ku soo cel-celiyey xusuusta habkii wax loo bililiqaysanayey ee diiratanimada ahaa iyo sida Tooreyda loogu kil-kilayey fiiladii dabka u soo qaadaysey Kombuyuutarka si loo qaato Shaashadda ama iskiriinka Kombuyuutarka oo loo malaynayo mid Fidiyow illeen lama garanayo inay kaga filantahay uun iyadoo fiilada laga soo siibo bareesada darbiga keliya, !!!

Waxaan kaloo xusuustaa wixii xog iyo cilmi ku jiray Kombuyuutaradaas oon hadhow lahayn meel kale oo loo raaco, intaas keliya maahane waxaan ku naqtiimay xusuusashada waxyaalihii lama arag lama maqalta wada ahaa een ilaa saakay iyo shalay arkayey intaan dhex wareegayey magaalada la is wada cayrsanayo.

Hadday tahay habka dadka loo dilayo ama loo silcinayo iyo hadday tahay habka wax loo bililiqaysanayaba waa wax hadaad ka sheekayso xataa aan lagaa rumaysan karin, waa yaab, waa naxdin, waa calool xumo, waa quusasho, waa qalbi dillaac. waxaadba mararka qaarkood is leedahay (kolley inta maanta ah unbaa adna saas oo kale laguu silcine maad hadda qolo si saaniya kuu disha raadsatid),

Waxaan sii ooyey markaan soo xusuustay nin Masri ah oo saakay la isla kaaya qabtay oo ka dib markii nala waraystay, anna aan sheegtay magicii qoladii na qabsatay, isna markii aan u caddeeyey in uu u dhashay reer Masar, uu nin soo booday oo yiri;

War nacallaa idin ku yaale ninka yaan mar kale Qabiil hebel loo malayn oo la diline ku dhiga summad, markaas baa inta sakiin la qaatay wejiga looga qoray (waa nin Masri ah) iyadoo uu dhiigu ka falaqlaynayo oo uusan waxba u jeedin ayayna fasexeen oo dheheen ka bul dheh.

Allah, Allow adaa jira oo jooga, allaylehe waad wada waalan tihiin aniga iyo ninkaas waallida ku caanka ahaa unbaana idinka fiyow gebi ahaantiin haddaad tihiin kuwa wax bililiqaysanaya iyo kuwa wax laynaya intaba, ayaan gocashadaydii murugo ku soo gaban gabeeyey.

MAXAAN LA DAREEMI

WEYNAY CADAABKA?.

Sida muuqata ma nihin kuwa cadaabkuba uu karo ama ogaan karaba in ay ciqaab iyo imtixaan ku jiraan oo waxaad aragtaa inaanan uba aabba yeelin wax kastoo nagu dhaca sidii lagu arki jiray Bani aadamka in ay markay dhibaato ama musiibo ku habsato ay baraarugaan oo intay isu yimaadaan wada raadiyaan xalkooda iyo daawadooda iyo siday uga bixi lahaayeen musiibadaas,

Ugu dambayntiina ay helaan xal waara oo dabadeed ay ku sii manaafacaadsadaan jiilalka ka sii

dambeeyaa, sida uu tusaale aan Yuhuud ku soo qaadanayba inoo caddaynayo, akhristow maxaad u malaynaysaa haddii maalinkii ugu horaysay ee dalka lagu arkay qof mayd ah oon lahayn ciddii dishay la baryi lahaa Alle awood badne oo aan qabiilna lagu tuhmi lahayn, miyaannu maanta qolo qolo isu layn lahayn? (mar kale bal igula fikir taas).

laakiin innaga maanta inkastoo halaag culisi nagu dhacay weli nooma muuqato sifihii looga bixi lahaa waayo waxaan tawbad iyo wanaajin gaari lahayn ka dib markaan garano in dhib na haysto iyo inaan qalad galnay, waxaa la yiri; War la helyaaba tala la hel.

Haddaan dhab ahaan u taabano sababta aan la dareemi la'nahay ciqaabka iyo cadaabkaba waxay ila tahay waxaa ka mid ah sababo dhawr ah oo na haysta;

1- rumayta Eebbaha awoodda dhabta ah leh oo nagu yar, ama caqiido xumo na fogaysatay oo naga indha saabtay xaqiiqooyin badan.

2- is la qumanaan iyo isla weynaan naga indha saabtay xaqiiqooyin fara badan, noona hor kacday wadiiqo qalloocan oo waaqla cidla ceersi la' ah ah.

3- inaga oo aan weligeenba raaxo iyo nolol sare arag oo qabatinay dhibka iyo shiddooyinka is daba joogga ah ee aanaan ka fikirin waxay yihiin.

4- jaahilnimo dhan walba leh oo iyadu ah hooyada cuduradoo dhanba.

Haddaba markaad middaas iyo kuwa kale oo badan ka eegto dadkeena waxaadba is leedahay malaha Yuhuuddii hore iyo guud ahaanba cawaantii hore ayaaba kuwan dhaantay, bal aan ka eegno xagga

maamullada iyo dhaqamada bulshada ee iyamaa wanaagsan Fircoon iyo mid ka mid ah madaxda maanta?.

Runtii taasi shaki ma leh oo fircoon wuxuu dhaamay in badan oo ka mid ah madax Soomaaliyeed iyo kuwa kalee caalamka maanta ka amar ku taagleeya, waa markaan ka eegno sidaan soo shegnayba xagga; caddaaladda, Dimoqraadinimada, xoriyadda, Caqliga iyo dadnimadaba, wadaninimada iwm.

Oo haddaanaan xaqiiqada iska indha tirayn waxaan ognahay inay tahay hab aanba maanta la rajeyn karin oo laga quustay, maxaa yeelay waxaa isaga caadi ah madaxda maanta in ay habeen madow ama si cadba u gawracaan oo ifka uga qariyaan kii ay ka dareemaan

inuu ka soo horjeedo xukunkooda xataa iyagoon wax hubsan.

Sidaa darteed waa mid aan la sugeyn in shakhsi keliyihi ku mucaarado amar ay soo jeediyaan iskaba daa in iyaga iyo dadweynohoodu ay fikrad iyo talo wadaagaane.

Sidaa Fircoon iyo si ka sii fiican bayna wada ahayeen kuwa kale ee Dhaaquutyada ahaa ee lagu sheegaya qur'aanka, tusaale kale sidii loola dhaqmay Nebi Ibraahim, markuu ka jajabiyey Asnaamtii ay u haysteen Ilaahyada muqaddaska ah, waxay u raadsheen markhaatiyaal ku caddeeya, ka dib markay ku hubsadeen, Ilaah wuxuu yiri;

قالوا من فعل هذا بألهتنا انه لمن الظالمين قالوا سمعنا فتي يذكرهم) (يقال له أبرهيم قالوا فأتوا به علي أعين الناس لعلهم يشهدون الآنبياء:59-61

(Waxay dheheen war yaa Ilaahyadeenii saan u galay, kuwaasi waa daallimiine, waxayna dheheen waxaan maqalnay will wax ka sheegaya oo la dhaho Ibraahim, saa waxay dheheen keena dadka indhahooda (hortooda) waxaa la arkaa in ay ku marag furaane) Al-Anbiyaa; 59-61.

.

Cutubka Afraad.

AAYADAHA CIBRA QAADASHADA EE LAGU SHEEGAY QURAANKA.

==========

SUURADDA HUUD.

والي عاد أخاهم هودا قال ياقوم اعبدوا الله مالكم من اله غيره ان أنتم قال ياقوم لاأسئلكم عليه أجرا ان أجري الا علي الذي , الامفترون وياقوم استغفروا ربكم ثم توبو اليه يرسل السماء ,فطرني أفلاتعقلون هود(عليكم مدرارا ويزدكم قوة الي قوتكم ولاتتولوا مجرمين:52

(Caadna waxaa loo diray walaalkood Nebi Huud, wuxuuna yiri; Qoonkayow caabuda Eebbe Ilaah kale

ma lihidine, waxaan been abuurasho ahayna kuma sugnidine. Qoonkayow idingama rabo xaq sheegga ujuuro, ujuuradayda waxaan uun ka mutaa Eebbaha i abuuray ee miyaadnaan waxgaranayn?

Qoomkayow dambi haaf waydiista Eebihiin una toobad keena ha idiinkaga soo diro samada korkiina - Roob-si badane hana idiinkugu kordhiyo xoogiina xooge, oo ha sii jeesanina idinkoo dambiilayaal ah),52.

قالو ياهود ما جئتنا ببينة وما نحن بتاركي اءلهتنا عن قولك وما نحن ان نقول الااعتراك بعض أءلهتنا بسوء قال اني أشهدوا الله ,لك بمؤمنين من دوني فيكيدوني جميعا ثم ,واشهدوا أني بريئ مما تشركون اني توكلت علي الله ربي وربكم ما من دابة الاهو أخذ ,لاتنظرون فان تولوا فقد أبلغتكم ما أرسلت ,بناصيتها ان ربي علي صراط مستقيم

به اليكم ويستخلف ربي قوما غيركم ولاتضرونه شيئا ان ربي علي كل شيئ حفيظ.

(Waxay ku dheheen Huudow noolama aadan imaanin xujjo cad kagamana tagayno Ilaahyadeena hadalkaaga kumana rumaynayno,53.

Wax kale kuguma dhahayno oo aan ahayn in Ilaahyadanada qaarkood ku dhaaween (isha kula heleen, inkaaru kaaga dhacday). Suuye Ilaahay baan marag gashanahayaa ee idinna ka marag ahaada in aan beri ka ahay waxaad la wadaajinaysaan (cibaadada Alle), ee Eebe ka soo haray, i dhagara hadde dhammaantiin hana ii suginina, anigu waxaan tala saartay Ilaahay ee ah Rabbigay iyo Rabbigiin ah, wax socda oo uusan fooda qabanayn ma jiraan (awoodayn),

Wuxuuna Rabbigay ku sugan yahay jid toosan, hadaad jeedsanaysaan anigu uun waa idin gaarsiinayaa wixii la ila soo diray, wuuna idinku baddelanayaa Rabbigay Qoon kale (oo idin ka fiican, inta idin cirib tiro idinka), waxna kama dhibaysaan oo runtii Rabbigay wax kaste isagaa ilaaliya,)57.

ولما جاء امرنا نجينا هودا والذين أمنوا معه برحمة منا ونجيناهم من
وتلك عاد جحدوا بأيات ربهم وعصوا رسله واتبعوا أمر ,عذاب غليظ
وأتبعوا في هذه الدنيا لعنة ويوم القيامة ألاان عادا كفروا ,كل جبارعنيد
ربهم ألابعدا لعاد قوم هود,

(Markuu yimid amarkanagii waxaan badbaadinay Huud iyo intii rumaysay naxariistanada awgeed, waxaanan ka badbaadinay cadaab aad u adag, waa tay reer Caad diideen Aayaadkii Rabbigood oo ay ku

caasiyoobeen fartiin wadayaashiisii iyaga oo raacay amarka isla weyne madax adag dhammaantiise, 59.

Waxaana la raaciyey Lacnad Adduun iyo maalinta qiyaamaba, Caad way beeniyeen Rabbigood (gaaloobeen) nabee inkaaraa ku dhacday Caad Qoonkii Huud ahaa,) 60.

والي ثمود أخاهم صالحا قال ياقوم اعبدوا الله مالكم من اله غيره هو أنشأكم من الأرض واستعمركم فيها فاستغفروه ثم توبوا اليه ان ربي قريب مجيب

(Thamuudna waxaan u dirnay walaalkood Saalix wuxuuna ku yiri; Qoonkayow caabuda Allaahay, Ilaah kale ma lihidine, isagaana idinka aasaasay dhulka idinkuna dhex camiraye, weydiista dambi

dhaaf una toobad keena illeen Rabbigey waa dhawyahay oo aqbalaaye (baryada)) 61.

قالوا ياصالح قد كنت فينا مرجوا قبل هذا أتنهانا ان نعبد مايعبد أعباؤنا وانا لفي شك مما تدعونا اليه مريب.

(Waxay dheheen Saalixow waxaad ku ahayd dhexdeena mid lagu rajo weyn yahay haatan ka hor, ma waxaad naga reebaysaa inaan caabudno waxay caabudayeen Aabayaalkanno? annaguna shaki daran baan ka qabnaa waxa aad noogu yeerayso), 62,

قال ياقوم أرءأيتم ان كنت علي بينة من ربي وأتاني منه رحمة فمن ينصرني من الله ان عصيته فما تزيدونني غيرتخسير ويأقوم هذه ناقة الله لكم أعية فذروها تاكل في ارض الله ولاتمسوها بسوء فياخذكم عذاب قريب.

(Suuye bal ka warama haddaan xujjo cad Rabbigay ka haysto oo uu xagiisa iga siiyey naxariis, yaa iga

dhicinahaya Ilaahay haddaan ku caasiyo? iimana aad kordhinaysaan wax aan khasaaro ahayne, 63.

Qoonkayow tani waa hashii Eebbe calaamad bayna idiin tahay ee iska daaya ha cunto dhulkaa Ilaahaye hana ku taabanina wax xumaan ah yuusan idin qabsan cadaab dhawiye), 64.

.(فعقروها فقال تمتعوا في داركم ثلاثة ايام ذلك وعد غير مكذوب

(Waxayse dileen hashii, wuxuuna yiri; ku raaxaysta guryihiina saddex maalmood kaasina waa yabooh aan la beenaynayne, 65.

(فلماجاء أمرنا نجينا صالحا والذين أمنوا معه برحمة منا ومن خزئ وأخذالذين ظلموا الصيحة فاصبحوا في يومئذ ان ربك هوالقوي العزيز ديارهم جا ثمين, كان لم يغنوا فيها الان ثمودا كفروا ربهم ألابعد لثمود.

markuuse u yimid amarkeenii waxaan ka badbaadinay Nebi Saalax iyo intii rumaysay naxariistano awgeed dulligii maalintaas, runtii rabbigaagu waa xoog badane adkaada, 66.

Waxaana qabatay kuwii dulmi falay qaylo markaasay noqdeen kuwa guryahoodii dhex gorofsan, 67. Sidii iyagoon ku dhex negaanin weligood, thamuud waxay beeniyeen Rabbigood waxayna muteen ba'iyo hoog),68.

ولماجاءت رسلنا لوطا سيئ بهم وضاق بهم ذرعا وقال هذا يوم عصيب. وجاءه قومه يهرعون اليه ومن قبل كانوا يعملون السيئات قال ياقوم هؤلاء بناتي هن أطهر لكم فاتقوا الله ولاتخزون في ضيفي أليس منكم رجل رشيد.

Markay Mala'iktaan soo dirnay u timid Nebi Luudh, wuu ka walbahaaray, talana way ku ciriiryoontay wuxuuna yiri; tani waa maalin daran, 77.

Oo waxaa u yimid qoonkiisiiyoo ruclaynahaya horayna xumaan falayaal u ahaa, suuye; Qoonkayow waa kuwaas gabdhahaygii iyagaana idiin banaane Ilaahay inta ka baqdaan ha igu ceebaynina (qaniisina) martidayda miyuusan nin keliyohoo waxgarad ihi idinku jirin?), 78.

Saaxiibow bal isku eeg kuwaan iyo kuweenii intay gabadha dhaafaan Ayeydeed ugu gu' tirinayey fuulitaanka, iyana ku amrayeen in ay daawato, Luudh wuxuu ka door biday inay gabdhihiisa guursadaan ama xaaraanba isaga fuulaan intay martidiisa qaniisi lahaayeen isaga oo hortaagan.

قالوا لقد علمت مالنا في بناتك من حق و أنك لتعلم مانريد

(Waxay ugu jawaabeen waad ogtahay in aanaan ku lahayn gabdhaaga xaq (dan iyo xaajo kama lihin) waadna ogtahay waxaannu doonayno), 79.

قال لو أن لي بكم قوة أوءاوي الي ركن شديد .

(Wuxuu yiri; (tol la'aye) haddaan xoog idiin lahaan lahaa ama aan laandheere ahaan lahaa), 80.

قالوا يالوط انا رسل ربك لن يصلوا أليك فأسر بأهلك بقطع من الليل ولايلتفت منكم أحد الاأمرأتك انه مصيبها ماأصابهم أن موعدهم الصبح أليس الصبح بقريب.

(Waxay dhaheen (Malaa'igtii); Luudhoow waxaan nahay farriintii Rabbigaa dhibna kumay gaarsiinayaan ee la dheelmo ehelkaaga habeen barkii dibna ha u soo jalleecin haweeneydaada mooyee waxaa ku dhacaya iyada waxa iyaga ku dhacayee, ballantooduna waa

uun waabarkiiye bal miyuusan waabarku dhaweyn?), 81.

فلماجاء امرنا جعلنا عاليها سافلها وامطرنا عليها حجارة من سجيل مسومة عند ربك وماهي من الظالمين ببعيد, منضود.

(Markuu yimid amarkeenii waxaan ka dhignay korkoodii hoostoodii (dhulkii baan la daba gedinay), waxaanan ku daadinay dhagaxyo la shiday oo is raac raacsan, 82. oo lagu calaameeyey Rabbigaaga agtiisa, kamana foga taasi daallimiinta,) 83.

والي مدين اخاهم شعيبا قال ياقوم اعبدوا الله مالكم من اله غيره ولاتنقصوا المكيال والميزان اني اراكم بخير واني اخاف عليكم عذاب يوم محيط وياقوم اوفوا المكيال والميزان بالقسط ولاتبخسوا الناس بقيت الله خير لكم ان كنتم, اشياءهم ولاتعثوا في الأرض مفسدين مؤمنين وماأناعليكم بحفيظ,

(Madyanna waxaan u dirnay walaalkood Shuceyb, wuxuuna ku yiri; Qoonkayow caabuda Eebbe Ilaah kale ma lihidine, hana nusqaaminina beegga iyo miisaanka waxaan idinku arkaa kheyre waxaanan idiinkaga baqahayaa cadaab maalin koobaysee, 84.

Qoonkayow oofiya beegidda iyo miisaanka si caddaalad ah, hana ka nusqaanina dadka waxooda dhulkana ha fasahaadinina, 85. baaqiga Eebbe yaa idiin kheyr roone hadaad tihiin kuwa rumeeyey, mana ihi mid idin ilaalinaya,) 86.

قالوا ياشعيب أصلواتك تامرك ان نترك مايعبد اباؤنا اوان نفعل في اموالنا مانشاء انك لانت الحليم الرشيد,

(Waxay dheheen Shucybow ma salaadahaagaa ku farahaya in aan ka tagno waxay caabudayeen

Aabayaalkanno ama aan waxaan doono ku samayno xooleheenna, adigu waxaadba tahay dulbadane toosane

قال ياقوم أرأيتم ان كنت علي بينة من ربي ورزقني منه رزقا حسنا وماأريد أن أخالفكم الي ماانهاكم عنه ان أريد الاالأصلاح مااستطعت وياقوم لايجرمنكم شقاقي ان ,وماتوفيقي الاباالله عليه توكلت واليه انيب يصيبكم مثل مااصاب قوم نوح اوقوم هود اوقوم صالح وماقوم لوط واستغفروا ربكم ثم توبوا اليه ان ربي رحيم ودود ,منكم ببعيد.

(Suuye bal Qoonkayow ka warama haddaan xujjo ka haysto Rabbigay, iguna irsaaqay risiq wanaagsan, oo aanan doonayna in aan idiin daba maro waxaan idinka reebayo, oo aanan doonayn waxaan wax wanaajin ahayn intaan karo, waafajintaydana cid aan Eebbe ahayni ma karto isagaanan tala saartay xagiisaanan u noqonayaa (tawbad keenayaa), 88.

Qoonkayow yuusan idinku xambaarin khilaafkeygu inuu idinku dhaco wixii ku dhacay Qoonkii Nuux ama Qoonkii Huud ama Qoonkii Saalax, Qoonkii Luudhna maba ahan kuwa idinka foge (waa dhaw), 89. ee Rabbigiin dambi dhaaf weydiista una tawbad keena, illeen Eebahay waa naxariiste jecele,) 90.

قالوا ياشعيب مانفقه كثيرا مماتقول وانالنراك فينا ضعيفا ولولا رهطك لرجمناك ومأأنت علينابعزيز

(Waxayse ku dheheen Shuceybow ma fahmayno wax badan oo aad sheegayso waxaanan kuu aragnaa in aad dhexdeena ku tabar yartahay, haddaysan cidaadu jirina waanba ku dhagaxyeyn lahayn, mana tihid adigu mid cisi nagu leh, 91.

قال ياقوم ارهطي اعز عليكم من الله واتخذتموه وراءكم ظهريا ان ورباقوم اعملوا علي مكانتكم اني عامل سوف ,ربي بما تعملون محيط تعلمون من ياتيه عذاب يخزيه ومن هو كاذب وارتقبوا اني معكم رقيب.

(Suuye Qoonkayow ma cidaydaaba idin kala weyn Ilaahay oo aad ka dhigteen waxaad gadaal isaga tuurtaan, runtii Rabbigeyna waxaad samaynaysaan waa koobayaa, 92. Qoonkayow bal wada waxaad falaysaan anna waan sii faline, waadna ogaan doontaan cidduu cadaab dulleeyaa u yimaadee iyo cidda beenaalaha ahbee ee suga anna waan sugine, 93.

ولما جاء امرنا نجينا شعيبا والذين أمنوا معه برحمة منا واخذت الذين كأن لم يغنوا فيها الابعدا ,ظلموا الصيحة فاصبحوا في ديارهم جاثمين ,لمدين كمابعدت ثمود

Telegram @Somalilibrary

(Markuu yimid amarkanagiina waan badbaadinay Shuceyb iyo kuwii rumeeyey naxariistanada awgeed, waxaana qabatay kuwii dulmi falay qaylo waxayna ahaadeen kuwa guryohoodii dhex gorofsan (meyd ahaan), 94. sidii iyagoonba deganaan jirin. Halaag baa u sugnaaday Madyan siday u fogaatay Thamuud (u halaagsantay), 95.

الي فرعون وملئه فاتبعوا امر ,ولقدأرسلنا موسي بأياتنا وسلطان مبين يقدم قومه يوم القيامة فأوردهم النار ,فرعون ومأمرفرعون برشيد واتبعوا في هذه لعنة ويوم القيامة بئس الرفد ,وبئس الوردالمورود ,ذلك من انباء القري نقصه عليك منها قائم وحصيد ,المرفود وماظلمناهم ولكن ظلموا أنفسهم فمااغنت عنهم ءالهتهم التي يدعون من وكذلك اخذ ,دون الله من شيئ لماجاء امر ربك ومازادوهم غيرتتبيت ان في ذلك لآية لمن ,ربك اذا اخذالقري وهي ظالمة ان أخذه أليم شديد

خاف عذاب الأخرة ذلك يوم مجموع له الناس وذلك يوم مشهود.

(هود:50-103).

(Waxaannu dhab ula dirnay Nebi Muuse Aayaadkanagii iyo xujjo cad, xagga Fircoon iyo Qoonkiisaanan u dirnay, waxayna raaceen amarka Fircoon mana ahayn amarkiisu mid hanuun ah, waxuuna horkacayaa Qoonkiisa maalinta qiyaame, wuxuuna ku aroorin Naarta meel lagu aroorana Naar baa u liidata, 98.

Waxaana la raacsiiyey Adduunyada iyo maalinta Qiyaamaba lacnad wax laysu kordhiyana waxaa u xun (arintaas), kuwaasi waa wararkii magaalooyinka waanan kaaga waramaynaa waxaanan ka mid ah kuwa taagan iyo kuwa la halaagay, mana aanaan dulmin ee iyagaa naftooda dulmiyey waxbana uma ay tarin Ilaahyadoodii ay caabudayeen Ilaah ka sokow.

Markuu u yimid amarkii Rabbigaana uma kordhin wax aan khasaaro ahayn, waana sidaas qabashada Rabbigaagu markuu doono in uu qabto oo ciqaabo magaalo (dadkeeda) dulmi fashay qabashadiisuna way xanuun badan tahay oo darantahay, arrimahaana calaamad baa ugu sugan cidii ka cabsan cadaabka Aakhiro waana maalin loo kulmin dadka dartiis, waana maalin loo soo joogsan, 103. Huud; == (50-103.).

QUBANE SUURADO KALE.

لعن الذين كفروا من بني اسرائيل علي لسان داؤود وعيسي ابن مريم) كانوا لايتناهون عن منكر فعلوه لبئس ذلك بما عصوا وكانوا يعتدون المائدة(ماكانوا يفعلون:78-79.

(waxaa lagu lacnaday kuwii gaaloobay oo Banii Israa'iil ah carrabka Daa'uud iyo Ciise Ibn Maryama, arintaasna waxaa ugu wacan caasinimadooda ay ahaayeenna kuwa xadgudba. Waxay ahaayeen kuwa aan iska reebaynin xumaan ay falaan, waxaa xun waxay falahayeen) Al-maa'idah; 78-79.

(واتقوا فتنة لاتصيبن الذين ظلموا منكم خاصة وأعلموا أن الله شديد العقاب) الأنفال:25.

(War iska jira fidno aan ku gaar noqonayn kuwii dulmiga falaye idin ka mid ka ahaa khaas ahaantood, ogaadana in eebbe ciqaabtiisu daran tahay) Alanfaal;25.

(ليميز الله الخبيث من الطيب ويجعل الخبيث بعضه علي بعض فيركمه جميعا فيجعله في جهنم اولئك هم الخاسرون) الأنفال:37.

(Waxay jirabaadu u dhacaysaa) si uu Eebbe u kala saaro xumaanta iyo wanaaga, yeelana xumaanta qaarkeed tan kale korkeeda markaasna dhammaantood kulmiyo uuna dhex dhigo Jahannama kuwaasuna waa uun kuwa khasaaray) Al--anfaal;37.

وضرب الله مثلا قرية كانت امنة مطمئنة يأتيها رزقها رغدا من كل) مكان فكفرت بانعم الله فأذاقها الله لباس الجوع والخوف بماكانوا يصنعون) النحل: 112.

(Eebbe wuxuu masaal idinkaga dhigayaa magaalo ahayd aamin oo xasiloonayd oo risiqeedu uga imaanayey isagoo barwaaqo ah meel kaste, oo markaas ka gaalowday nimcooyinkii Eebbe, markaasna Eebbe dhadhansiiyey gaajo dabooshay iyo cabsi xun fal-fal xumadoodii awgeed) Al-naxli;112.

ولاتقولوا لماتصف ألسنتهم الكذب هذا حلال وهذا حرام لتفتروا علي) الله الكذب, إن الذين يفترون علي الله الكذب لايفلحون)النحل:116.

(Oo ha dhihina wuxuu carrabkiinu ku tilmaamayo been kani waa xalaal kanna waa xaaraan, in aad ku been abuurataan Eebbe, kuwa ku been abuurta Eebbe ma liibaane) Al-naxli; 116.

Telegram @Somalilibrary

فاذاجاء وعدأولاهما بعثنا عليكم عبادا لنا أولي بأس شديد فجاسوا) خلال الديار وكان وعدا مفعولا ثم رددنا لكم الكرة عليهم وأمددناكم ان أحسنتم أحسنتم لأنفسكم وان ,باموال وبنين وجعلناكم أكثر نفيرا أسأتم فلها فاذاجاء وعدالأخرة ليسوءوا وجوهكم وليدخلوا المسجد عسي ربكم أن يرحمكم وان ,كمادخلوه أول مرة وليتبروا ماعلوا تتبيرا .8-5:الأسراء (.عدتم عدنا وجعلنا جهنم للكافرين حصيرا

(markuu yimaado yabooha mida hore waxaan idinku soo bixinaa adoomadano u saaxiib ah baas (balaayo) daran, markaasay dhex xaluulanayaan (hanan oo bililiqaysan) surin (luuq) kaste oo guryaha ah (mooryaan diirato ah oo lagu diray reer Bani isra'il markay kibreen) taas oo ahayd yabooh la falayo, 5.

Markaasaan idin ku soo celinay dawladnimadii idinkuna xoogaynay xoolo iyo caruur oo idnka dhignay kuwa tiro badan, 6. hadaad samafashaan

waxaad u samafashaan naftiina, haddaad xumaan gashaana waa uun naftiina, markuu yimaado yabooha dambana way xumeeyaan wejigiina iyo inay galaan Masaajidka siday ugaleen markii hore iyo in ay tirtiraan waxay u adkaadaan tirtirid,7. waxaa la arkaa in rabbigiin idiin naxariisto, hadaad u noqotaane, waanu unoqon Jahanamaanan gaalada uga dhignay gogol,8) Al-Isra'; 5-8.

(من أعرض عن ذكري فان له معيشة ضنكا ونحشره يوم القيامة أعمي)طه:124.

(Ruuxiise ka jeedsada xuskayga (Quraanka) waxaa u sugnaaday nolol aad u ciriiri ah, waxaanan keenaynaa maalinta qiyaamo isagoo arag la') Dhaaha;124.

وكم أهلكنا من قرية بطرت معيشتها فتلك مساكنهم لم تسكن من بعدهم) وماكان ربك مهلك القري حتي يبعث في ,الاقليلا وكنا نحن الوارثين أمها رسولا يتلوا عليهم اءياتنا وماكنا مهلكي القري الا وأهلها ظالمون) القصص:58-59.

(Badanaa intaan halaagnay magaalo ku kibirtay nolosheedii waana taas guryohoodii aan gadaashood la degin wax yar mooyee annaga unbaana ah kuwa dhaxla, 58.

Mana ahan Rabbigaagu mid halaaga magaalooyin ilaa intuu uga dirayo caasimadooda Rasuul ku akhriya Aayadeheena korkooda (xaqqa looga sheego) mana nihin kuwa halaaga magaalo aan ehelkeedu daallimiin ahayn) Al-Qasas; 58-59.

(ولنذيقنهم من العذاب الأدني دون العذاب الكبر لعلهم يرجعون) السجدة:21.

(waxaan dhadhansiinaynaa cadaabka adduun kan weyn ka sokow bal inay noqdaan) Alsajda;21.

(واذا أردنا أن نهلك قرية أمرنا مترفيها ففسقوا فيها فحق عليها القول فدمرناها تدميرا)

الاسراء: 16

SUURADDA AL- ACRAAF.

واذا قيل لهم اسكنوا هذه القرية وكلوا منها حيث شئتم وقولوا حطة) وادخلوا الباب سجدا نغفرلكم خطيئاتكم سنزيد المحسنين,الآعراف:161.

(Bal eeg markii lagu yiri dega magaaladaas kana cuna meeshaad doontaan dhahana Eebbow noo dambi dhaaf, kana gala albaabka idinkoo sujuudsan aan idiin dhaafno dambigiinee una sii kordhino samafalayaashee, 161.

فبدل الذين ظلموا منهم قولا غير الذي قيل لهم فأرسلنا عليهم رجزا من السماء بما كانوا يظلمون.الآعراف:162.

kuwoodii dulmi falayse waxay ku badeleen hadal kale oon ahayn kii lagu yiri, saa waxaan ku dirnay cadaab samada kaga yimid dulmigoodii dartiis,162.

وأسئلهم عن القرية التي كانت حاضرة البحر اذيعدون في السبت اذتأتيهم حيتانهم يوم سبتهم شرعا ويوم لايسبتون لاتأتيهم كذلك نبلوهم بماكانوا يفسقون:الآعراف.163

bal weydii magaaladii badda ku dhaweyd markay xadgudbayeen sabtida (shaqaysanayeen ka dib markii lafaray in ay cibaadaystaan baddelkanaga jimcaha), oo markaas Kalluunkoodu u imaanayey maalintaa Sabtida ah isaga oo muuqda, maalintaan sabti ahayna uma imaado, saasaanan ugu imtixaanay faasiqnimadooda darteed, 163.

واذقالت أمة منهم لم تعظون قوما الله مهلكهم أومعذبهم عذابا شديدا قالوا معذرة الي ربكم ولعلهم يتقون:الآعراف.164

ka waran markay ummadoodii qaar dheheen war maxaad ka wacdinaysaan Qoon ilaahay halaagayo ama si daran u cadaabayo, say ku dheheen (culimadii intii kale) war waa ugu cudurdaarasho Rabbigiina, waana intaasoo ay dhawrsadaane),164.

فلمانسوا ماذكروا به أنجيناالذين ينهون عن السواء وأخذناالذين ظلموا بعذاب بئس بماكانوا يفسقون.165

(Markay halmaameen wixii lagu waaniyey waxaan badbaadinay kuwii xumaanta reebayey waxaanan ku qabanay kuwii dulmi falay cadaab xun faasiqnimadooda darteed, Al-acraaf;165.

فلماعتوا عن مانهوا عنه قلنالهم كونوا قردة خاسئين.الآعراف:166

Markay ku madax adaygeen wixii laga reebay baan ku niri Noqda daanyeerro dullaysan, 166.

واذتأذن ربك ليبعثن عليهم الي يوم القيامة من يسومهم سوءالعذاب ان ربك لسريع

العقاب وانه لغفوررحيم. الآعراف:167.

(Bal xusuusta markuu Eebbe ogeysiiyey inuu u soo bixinayo Yuhuud tan iyo qiyaamaha cid dhadhansiisa cadaab xun, runtii ciqqabta Rabbigaaguna wey deg-degtaa, waana dambi dhaafe naxariista, 167.

وقطعناهم في الأرض أمما منهم الصالحون ومنهم دون ذلك وبلوناهم بالحسنات والسيئات لعلهم يرجعون. الآعراف:168.

waxaanan ku kala firdhinay dhulka iyagoo ummado ah, kuwa suuban iyo kuwa kaleba waxaan ku imtixaanay wanaag iyo dhibba, bal waa intaasoo ay noqdaane (toobad keenaane), 168.

فخلف من بعدهم خلف ورثوا الكتاب يأخذون عرض هذا الأدني ويقولون سيغفر لنا وان يأتهم عرض مثله يأخذوه الم يؤخذ عليهم ميثاق الكتاب أن لايقولوا علي الله الاالحق ودرسوا مافيه ولدار الأخرة خير للذين يتقون أفلاتعقلون .الآعراف:169

Waxaana baddelay kuwa xun oo dhaxlay kitaabkii qaadanayana dhal-dhalaalka adduunyada iyagoo leh waa naloo dambi dhaafi doonaaye, haduu hadana u yimaado dhal-dhalaal la mid ihi way qaadanayaan, miyaan looga ballan qaadin kitaabka inaysan Ilaahay waxaan xaq ahayn ku sheegin iyo in ay bartaan kitaabka, daarta Aakhiraana u kheyr roon kuwa dhawrsada ee miyaadnaan wax garanayn?,169.

(والذين يمسكون بالكتاب وأقاموا الصلاة انالانضيع أجرالمحسنين .الأعراف: 161-170

Kuwa qabsada kitaabka oo ooga salaadda annagu ma lumino ajirka kuwa wax wanaajiya, 170. == (Al-Acraaf;161-170).

ولوأن أهل القري أمنوا واتقوا لفتحنا عليهم بركات من السماء) أفأمن أهل القري ,والأرض ولكن كذبوا فأخذناهم بماكانوا يكسبون أوامن اهل القري أن ياتيهم بأسنا ضحي ,أنياتيهم باسنا بياتا وهم نائمون (أفأمنوا مكرالله فلايأمن مكرالله الاالقوم الخاسرون ,وهم يلعبون الأعراف: 96-99.

(Hadday dadka magaalooyinku rumayn lahaayeen xaqqa oo dhawrsanaan lahaayeen waxaan ku furi lahayn korkooda barakada samada iyo dhulka, wayse beeniyeen waanan qabanay waxay shaqaysanayeen awgeed, 96. oo miyey ka aamin noqdeen dadka magaaladu inuu u yimaado baaskanagu iyagoo habeenkii iska hurda, 97.

Miyeyse ka aamin yihiin dadka magaaladu in uu u yimaado baaskeenu barqadii iyagoo iska cayaaraya, 98. ma waxay ka aamin noqdeen baaska Eebbe, ciddii khasaartay unbaa ka aamin noqota ciqaabka, ba'a iyo baaska Eebbee), 99. (Al-acraaf;96-99.).

GABAN GABO.

Taxanaha Aayadahaas Quraaniga ahi waxay ina wada tusayaan tusaalayaal iyo fikrado caqli celineedyo badan oo uu wax ku qaadan karo ku kastoo uu Alle hanuun la damcay, ka dib markuu si dhab ah oo daacadnimo iyo xaqsoornimo cadaaladeed ee faham toosani ku dheehan yahay ku indha indheeyo,

Taas oo lagu keeni karo marka aayad walba gooni ahaanteeda loogu istaago oo loogu fiirsado si diqqi ah iyadoo lala bar-bar dhigayo ficiladeena waaqiciga ah ee aan ku dhaqano lana soo helayo xiriirka iyo is waafaqa ka dhexeeya astaamihii iyo fal-fal

xumooyinkii ay quruumihii hore samayn jireen iyo kuwaan inagu samayn jirnay ama weli samayno ee nagu sababay inaan la kulano halaageenii maanta.

Inkastoo dhibka ugu weyne weli na haystaa uu yahay in aanan weli fahmin in lana cadaabayo iyo in kaleba, in aan dambi galnay iyo in kaleba, in qalad naga suurtoobo iyo in kaleba, in taariikh hore ee lagu cibri qaadan karo ay jirto iyo in kaleba, in Quraankani uu yahay mid khuseeya falalkeena iyo in kaleba.

Bal eeg akhristaha niyadda wanaagsanow, markii ay reer Qibdhi dhibeen oo naftii u keeneen reer Banu'isra'il, Ilaah uguma hiillineyn waa la dhibay oo keli ah ee waxaa eegayey xataa sida ay iyaga qudhoodu bal u dhaqmi lahaayeen haddii fursadda la

siin lahaa. Eebe weyne oo taas u sii sheegaya si ay uga sii digtoonaaadaan ayaa ku yiri:

(وقال موسي لقومه استعينوا بالله واصبروا ان الآرض لله يورثها من يشاء والعاقبة للمتقين قالوا أوذينا من قبل أن تأتينا ومن بعد ماجئتنا قال عسي ربكم أن يهلك عدوكم ويستخلفكم في الآرض فينظر كيف تعملون)

Halka aan ka doonayno tafsiirka Aayaddan = Maxalu shaahidkeedu waa kelmadda ah “ Waxaa la arkaa in uu Eebbe halaago cadawgiinna, oo idin reebo carriga si uu markaa idiin eego bal waxaad samaysaan, yacni bal inaad ka soo raysaan iyo inaad qudhiinuba sii xumaataan.

MIYAAN IS SHABAHNAA

INAGA IYO YUHUUDI?

Sida ka muuqata dadkeennu waxay u arkaan in qisooyinka cibra qaadashada leh ee ku soo arooray Qur'aanka ay yihiin taariikho iyo waabaa waxaa jiri jiray, taas oo ku dhisan ku tiri ku teen iyo sheekooyin la isku maaweeliyo.

Sidaa si la mid ahna waxay u maleeyaan in cadaabka la sheego uusan asal ahaanba ka dhici karin Adduunkan ee uu ka askumo uun isa soo bixinta dambe iyo is xisaabinta Aakhiro oo keliya, taasna uu

dambigeeda iyaga ahaan Alle isaga dhaafayo maadaama ay ku dhasheen Islaanimo,

Waxay kale oo aaminsan yihiin in Aayadahan Qur'aanku ay ku soo degeen dadyow aad u ahaa axmaqiin oo waxay ku dhaqmayeen aan ilaa hadda wax ku dhaqmay iyo wax ku dhaqmi doonaa jirin is kaba daa in ay iyaga Soomaaliya ka dhacaane,

Waxaas oo dhamina waxay dhaxalsiisay in ay dadkeennu isu arkaan kuwa Adduunka ugu qaalisan, uguna saxsan aysanna suurtoobi karin inay qaldamaan sidaas darteed markay arkaan Aayad Qur'aan ah oo ka hadlaysa Qoon xumaan falay ka dibna Alle ka aaray waxay ka qaadaan qosol iyo jees jees iyaga oo leh dad xun bay ahaayeen.

Waxaana laga yaabaa in kan sidaas lihi uu faraha kula jiro xumaano iyo fal dambiyeedyo kun jeer ka sii xun tuu Eebbe ku halaagay Qoladaas oo ka dhigaysa iqarso, waxaas oo dhanba tan inooga daran ee na haysataa waxay tahay horta hanala halaago ama cadaabee ma nahay kuwa fahmaya ama dareemaya cadaabkaba?.

Intaas haddaan uga gudubno fikradahaas gurracan ee aan iska tusinay maskaxdeena, tixraaca dambana aan ku lahayn caqliga fiyow iyo kitaabka Alle toona, bal aan isku dayno in aan ka jawaabno oo xal u helno fikradahaas gurracan.

Waa midda hore ee Aayadaha Qur'aanku dhammaantoodba waxay quseeyaan oo la hadlayaan waa innaga, oo marka ay ka waramayaan Qolo hore

iyo falalkoodii waa digniin iyo tusaalayn naloo kugu caqli celinayo ama naloo kugu caga juglaynayo, waxaana loola jeedaa falkaas ayey ku xumaadeene iska jira idinku oo haku dhicina dabinkii ay ku dheceen.

Haddaba Aayadda ku soo degtay Fircoon waxay la hadlaysaa oo warka u jeedinaysaa mid kaste oo naga mid ah kuu doono ha ahaadee.

Anaga oo ka jawaabayna fikradda isla weynida beenta ah ku dhisan ee dadkeena habaabisay aan dhexgelino jawaabta ciwaankeenan ee ah maxaan ku kala duwanahay inaga iyo Yuhuudi? mise is shabihi karnaa oo ma la isku soo keen qaban karaa? waxayna tahay jawaabtu Haa, haddaanaan ka leexan jidkay qaadeen.

Sida maanta inoo muuqatana ficillo badan oo ah kuwii iyaga lagu halaagay inagu caano uma kabbano oo waanba caadaysanay inaga oo qaarkood ku faanayna. Bal isu bar bar dhig Qur'aanka iyo dhaqankeenna oo haddana isu barbar dhig dhaqankeenna iyo dhaqankii Yuhuud ama waqti jaahiligii, maxaa kuu soo baxaya? waxaad weliba naf ka quusanaysaa marka aad aragtid ficillo ama fikrado ayba Yuhuudi nagu dhaantay.

Haddii aan mar kale hoos ugu sii dhaadhacno xusitaanka wax ka mid ah waxyaalaha ay nagu dhaameen, waxaan ku horaysiinaynaa madaxdoodii iyo kuweennii ee bal aan ka tusaalaysanno Fircoon,

Fircoon wuxuu ahaa nin aad uga fiican guud ahaanba madaxda maanta adduunka ka jirta intooda badan, mid dhif iyo naadir ah mooyee, wuxuu ahaa wax garad u dhuun daloola dhismaha mustaqabalka siyaasaddiisa iyo qancinta shacabkiisa, halka ay kuwa maanta jiraa keliya ka fikiraan sidee baad wax u boobtaa, xukunna ugu adkaysataa si muruq adeegsi ah?,

Taasna waxaad garan kartaa marka aad u fiirsatiod habka uu u la hadlay dadweynihiisii markuu doonayey in uu ka jeediyo Nebi Muuse NNKHA, sidaa si la mid ah wuxuu ahaa nin Dimoqraadi dhaba ah.

Waxaana taas kuu caddaynaya guud ahaanba qisada dhex martay isaga, wasiiradiisii, shacabkiisii,

iyo Nebi Muuse, taas oo aad ka dareemayso in uu ula doodayey sida ugu haboon ee mucaarad loola doodi karo, aan ka eegno Suuradda; Dhaaha; Aayadaha; 40-70, waxaana ka mid ah wada hadaladaas;

5قال فمن ربكما ياموسي قال ربنا الذي أعطي كل شيئ خلقه ثم هدي)
قال علمها عند ربي في كتاب لايضل 51قال فما بال القرون الآولي
52ربي و لاينسي

(Wuxuu yiri (Fircoon) waa ayo Rabbigiinu Muusow?, wuxuu yiri (Muuse) Rabbigeennu waa kan siiya wax kaste abuurkiisa oo toosiya, suuye (Fircoon) sidee yahay xaalkii Quruumihii hore? suu yiri; (muuse) cilmigoodu Rabbigayga agtiisuu yahay Kitaab aan ka lumaynin Rabbigayga uusanna illoobayn) 49-52.

قال أجئتنا لتخرجنا من أرضنا بسحرك يا موسي فلنأتينك بسحر مثله)

57-58(فاجعل بيننا وبينك موعدا لانخلفه نحن و لاأنت مكانا سو ي

(Wuxuu yiri (Fircoon) ma waxaad noola timid in aad nagaga bixiso dalkanaga sixirkaaga, 57, waxaannu kuula imaanaynaa sixir la mid ah ee noo dhig dhexdeenna ballan aynaan baajinayn anaga iyo adiguba, meel go'an (yaanaan isu goyn) 58.

Qasadka aan ka leenahay amaanta Fircoon waxa keliya ee ay tahay in aannu la barbar dhigayno kuwakan maanta jira ee isagii ka sii daran, si aannu u helno heerka uu gaarsiisan yahay xumahoodu, sidaa awgeed ma noqon karo is bar bar dhigeennu in aan sharaf iyo wanaag u hayno Fircoon,

laakiin bal adba akhristow is weydii mar hadduu Fircoon ahaa nin madax ah oo isagu gaaray heer uu Ilaahnimo sheegto, lagana aqabalo oo la caabudo,

Muxuu kolkay Muuse iyo Haaruun oo ka dhashay qoladii uu taag darraysanayey ula yimaadeen in uu qudhiisuba caabudo Ilaaha dhabta ah, iskana casilo xilka Ilaah sheegasho ee uu u hayo kuwa isaga caabuda ugu tuuri waayey xabsi ama uga takhalusi waayey? illeen laba Cali isma weydiiseen magtooda ee, waa kan ilaa iyo intaa la doodaya oo isagiiba ka codsanaya in uu inta waqti ballan u qabto, uusan haddana u goynin ee.

Waxaa kale oo taa ka sii daran markii ay u timid inantii la dhalatay Muuse oo shacabka hoose ka mid ahayd, ayna kula talisay in ay muluqii Muuse ahaa u

dhiibaan haweenay dan yar ah (hooyadiis) si ay u xanaanayso, ayna ka yeeleen, halka aysan madaxda maantu marnaba u ogalaan lahayn inanta noocaas ah in ay la kulmaan ama qaabilaan iska daa wax talo iyo tusaale ah oo ay ku biiriso ee,

40 (أذتمشي أختك فتقول هل أدلكم علي من يكفله فرجعناك الي أمك)

(waxaan kugu mannaysanay) markay socotay walaashaa oo ay lahayd ma idin tusiyaa ruux idiin dhaqaalaynaya, waxaanan kugu celinay Hooyadaa) 40.

Xataa nidaamkii Fircoon waxa uu ahaa mid ku dhisnaa habka xisbiyada badan ee aan ahayn Dictator, keligii taliye, wuxuuna u fasaxayey xisbigii la tartama xoriyadda saxaafada, isaga oo si toos ah ula hadli karay dadweynaha, oo waata uu dhawr jeer Ilaah

qura'anka ku sheegayo in uu Nabi Muuse u jeediyey hadal wax ku ool ah subixii banka [tarabuunkoodii] la isugu soo baxay si ay u dhacdo doorasho loo madax banaan yahay, oo ciddii isa soo sharaxaysayna ay xor u ahayd in ay soo ban dhigto wixii karaankeeda ah. Wuxuu Nebigii Muuse ahaa ku yiri dadkii

(ويلكم ثواب الله خير) .مريم (ويلكم لاتفتروا علي الله كذبا) .طه

(war waa hoogiiniiye, ha ku been abuuranina Ilaahay) iyo (Allah, war waa hoogiineeye, Ajir bixinta Ilaahaybaa ka weyn, waxa uu ninkani idiinkugu yeerayo)

waxaa kale oo ah sharaf aysan marnaba mutaysan karin kuwa maanta jiraa oraahdiisa ah;

64 (وقد أفلح اليوم من استعلي)

(waxaa liibaanay maanta ciddii saraysee (anaga iyo muuse) 64. iyo sidaa oo kale waxaa iyana la yaab leh sidii uu ula macaamiltamay markii la isugu yimid goobtii kala reebtada ahayd,

65(قالوا ياموسي اما ان تلقي و اما أن نكون أول من ألقي)

(waxay dheheen Muusow ama tuuro usha ama aan anagu hor tuuranno) 64. eeg; Q;S; Dhaaha; 40-70.

Arimaha ugu cajiibsan ee qisada Nebi Muuse iyo Fircoon waxaa ka mid ah markii uu inta Muuse ku soo koray guriga Fircoon, uu haddana nin ciddiisa oo reer boqor ah dilay, uu fakaday, ka dib markuu soo noqdayna uu ula yimid Fircoon in uu iska casilo jagadiisii madaxweynenimo iyo Ilaahnimaba sheegadka ahayd, ee uusan kula soo boodin Fircoon dil iyo xarig toona balse uu kala dooday arintiisii

isaga oo markhaatiyaal u yeelayey xaajadiisa, oo marba guddi iyo ergo u saarayey,

Isla markaasna xaalkiisa kala tashanayey Wasiiradiisii iyo shacabkiisii, isaga oo intaa isku dayayey in uu iska diro Muuse oo qanacsan kuna xishoodsiinaya soo korintii iyo dambigii uu ka galay oo uusan waxba u haysan. iyo weliba uu ula gorgortamayo shaqaalihiisii iyo shacabkiisii rayadka ahaa, oo ku leh; aan la hardanno ninka ee adigu horta wax ma noo ogoshahay? uuna u ballan qaadayo in abaal gud ka siinayo haddii ay guul usoo hooyaan. eeg Suuradda; Al-Shucara; 17-51.

QOLADEE NAGA MACANGAGSAN?.

Runtii wey badan yihiin waxyaalaha uu Fircoon ku dhaamay madaxdeena iyo kuwa kale ee badan oo kulligood sheegta in ay joogaan duni lagu ilbaxay oo ay caddaalad iyo xorriyadi ka jirto, oo laga gudbay heerkii keli talinimada iyo amar ku taaglaynta. laakiin qoritaanka waxaas oo idil ayaanaan imminka kasho u haynin, sidaa awgeed waan ka gaabsanaynaa, maadaama aysan cinwaankeenni ahayn,

Wuxuuse hadal ku dhan yahay in la wada hadlo oo gardarre kaste gartiisa la dhegaystaa waa lagama

maarmaan waana mid aan ka baranayno Eebbe weyne qudhiisa oo intuu ku caasiyoobay mid xun (Ibliis) oo ka mid ahaa addoomadiisa, haddana wada xaajood la galay oo si degenaan ah u weydiinaya wixii ku kallifay in uu gedoodo, wuxuu Ilaah yiri;

(قال يا أبليس مامنعك أن تسجد لما خلقت بيدي أستكبرت ام كنت من العالين قال أنا خير منه خلقتني من نار وخلقته من طين قال فاخرج منها فانك رجيم وان عليك لعنتي الي يوم الدين قال رب فانظرني الي يوم يبعثون قال فانك من المنظرين الي يوم الوقت المعلوم قال فبعزتك لآغوينهم أجمعين الاعبادك منهم المخلصين قال فالحق والحق أقول لآملئن جهنم منك وممن تبعك منهم أجمعين) ص: 75- 85.

(Eebbe wuxuu yiri; Ibliisow maxaa kuu diiday in aad u sujuuddo kaan ku abuuray gacantayda,? miyaad is kibrisay mise waxaad ka mid noqotay kuwa isla sarreeya? Wuxuuna yiri; Anaa ka kheyr roon isaga oo

waxaad iga abuurtay Naar isagana waxaad ka abuurtay dhoobo.

Eebbe wuxuu ku yiri; Iiga bax samadayda, waxaad tahay mid la dheereeyee. korkaagana ha ahaato lacnadayda ee tan iyo maalinta abaalmarinta. Suuye (Ibliis) Rabbiyow ii sug tan iyo maalinta la soo bixinayo dadka. Eebbe wuxuu ku yiri; (waa yahay) waxaad ka mid tahay kuwa loo sugayo, tan iyo maalinta waqtiga la yaqaan ah. Suuye (Ibliis):

Waxaan ku dhaartay sharaftaadee waan habaajinahayaa dfhammaantood. Marka laga reebo addoomadaada suuban. Eebbana wuxuu ku yiri; dhabtaan ku sifoobaa dhabtaanan u hadlaa ee ballan waxaan ku qaaday in aan Jahannamo ka buuxshaa

adiga iyo intii ku raacdaba ee dadka ka mid ah dhammaantood) Saad; 75- 85.

Ee bal mar kale aan isu bar bar dhigno qoladeenna Soomaaliyeed iyo qoladii Yuhuudda ahayd ee aan ku durno madax adaygga iyo caasinimada ku dhisnayd jaahilnimada, waxaanan tusaale uga soo qabsanaynaa markii ay arkeen aroortii nin la dilay xalay oo la soo dhex dhigay xaafaddii, ayna qiyaaseen in ay arintani dhalin karto fidno culus oo laga yaabo in ay keento colaad qabiileed, waxay ku ordeen Nebi Muuse, waxayna ka codsadeen in uu Ilaah uga baryo in uu u sheego ciddii dishay ninkaas, iyagoo ku dhawaaqay in ay hanuunsami doonaan haddii Alle idmo.

(واذ :الي----وأذقا ل موسي لقومه أن الله يأمركم أن تذبحوا بقرة البقرة (قتلتم نفسا فادارءتم فيها :67-72.

(xusa markuu ku yiri Muuse Qoonkiisii Ilaahay wuxuu idin farayaa in aad gawracdaan Sac, ayna dheheen miyaad nagu jees jeesaysaa? wuxuuna yiri; waxaan ka magan gelayaa Eebbe in aan ka mid noqdo jaahiliinta. 67. Waxayna dheheen noo bari Eebbahaa ha noo caddeeyo waxay tahaye) eeg ilaa iyo Aayadda; 73 aad ee taxanaha Aayadahakan.

Waxaad helaysaa in ay dadkaasi naga wax garadsanaayeen oo ay garan kareen waxa ay dambi galeen iyo sida lagu xallin karo ciqaabaha uu Eebbe ku ciqqabo, oo bal eeg haddii maalintii ugu horeysay ee magaala Soomaaliyeed lagu arkay qof meyd ah oo aan la garaanayn ciddii dishay la ducaysan lahaa oo Ilaahay loo soo tawbad keeni lahaa iyada oo laga tanaasulayo xumaanihii faraha lagula jiray ee aan

lagu duuli lahayn reer hebel oo looga shakisnaa miyey dhici lahayd tan maanta dhacday?,

Haddaba reer Banuu Israa'iil waxay ahaayeen kuwa garta oo qirta dambiyadooda sida ay u garan jireen carada Eebbe ee ku dhacdaba, sidaa darteed waxaad arkaysaa iyaga oo madax adayg awgiis isku dayaya in ay Eebbe khayaanaan oo dhahaya Eebbow noo dambi dhaaf oo ciqaabta naga qaad hadda ayaan ku rumaynaynaaye, ka dib markay yara nastaana halkoodii ka sii miisanaya.

Soomaali ahaan waxaan ku dhalanay Islaanimo oo si gooni ah buu Alle noo jecel yahay waa fikrad habawday oo meel beeshay, waxaana jawaab celin kaga filan Fircoonba Islaanimuu ku dhashaye ka warran, maxaa yeelay ku kastoo dhashaaba wuxuu ku

dhashaa Islaanimo, taas oo ah fidrada wanaagsan ee rabbaaniga ah, waase siduu ka dib camalkiisu noqdo oo ku walba goonidiisa ayuu Eebbe weyne ugu xisaabinayaa camalkiisa iyo qawlkiisa (falkiisa iyo oraahdiisa) isagoo aan innaba u eegin ab iyo awoow toona.

SIDAY ANIGA ILA TAHAY.

Inta aanaan u sii dhaadhicin tala soo jeedintayda ayaa waxaa ila quman in aan kolka hore isla garano waa kee hab wanaagga iyo xalka aannu doonaynaa? ma dhalanteedyada ay dad badani ku daalaan ee ah heshiisyo khayaaneedkaa mise waa heshiisyo dhaqameedkii hore ee ay odayaasheenu sida ku meel gaarka ugu kala saxiixan jireen geedka hoostiisa?, sidoo kale ma is khayaanaynta iyo is daba mardaamaynta ay kuweenna siyaasi iska yeelaka ihi ay isku khayaanaynayaane uu mid walba ku doonayo in uu kana kale jaraha uga boodaabaa?.

Dhabtii haddii uu mid ku fikirayo noocyada dhalanteed ee ay kuwaasii ka mid yihiin yuusan isku daalin akhriska Kitaabkaygan ilaa iyo inta uu ka soo garawsanayo waxa xaqiiqa ahaan u suurtoobi kara ee ruux la gudboon in uu ku fikiro ama ku han weynaado.

Akhristow ma ogtahay in dhakhtarkuba uusan dawaynta bukaanka ka bilaabin qalliin (surgery), ee u soo maro heerar kala duwan oo kala hooseeya, kuwaas oo uu midba midka kale u sii gudbinayo dariiqooyin iyo tabooyin loo maro oo ay keentay lagama maarmaanimadeedu.

Marka hore wuxuu dhakhtarku ku siiyaa Kiniinka xummadda jebiya iwm, marka labaad ee aad isla xanuunkii ugu soo noqotana wuxuu kugu caawiyaa

xabbado Kaniiniyo ay heerarka Garaamkeedu sareeyaan ah, marka saddexaadna waxaysan daweyntaadu ka fursanaynin Irbado, marka afraadna in lagu jiifiyo, ilaa iyo marka dambe oo ay xaaladaadu gaarayso heer qalliin.

Bal haddaan anna isku dayo in aan ka dhiibto ra'yigeyga arintaan murugsan oo madaxa iskula jirta, aan qodobyo kooban ku soo aruuriyo qaabka ay iigu muuqato in lagu gaari karo dhismo dawladeed oo ka fiyow calool xanuun iyo daacuun cuqdadeed, kuna shaqaysata dhiifoonaan iyo hididiilo ay ku tiigsanayso dhaamankii socdee ka hor wabxay. waxayna yihiin qodobadaasi sidatan;

1- Ha la helo doonis dhab ah oo maman laguna doonayo dawladnimo, taas oo ka dhar la' guud

ahaanba malabsiga iyo ciilkaambiga ku dhisan Munaafaqnimada, una go'doonsan Ilaahay dartiis.

2- Ha laga tanaasulo isla weynida iyo isla qumanaanta, oo ruux walbaa ha aqoonsado jiritaanka iyo dadnimada kan kale.

3- Ha loo liqo dib dhammaanba is huruufiddii iyo ficiltan foodleygii la caadaystay oo ha lagu mashquuliyo maskaxda samafallo dhaama.

4- Ha ku mashquulo waddani kastaaba wax soo saar uu naftiisa iyo ehelkiisa ku anfacayo, hadduusan cid ka dheer wax ku tarayn.

5- Ha loo baddelo isugu gargaarkii iyo isku kaalmaysigii reer hebelka iyo ina hebelka ee ku

salaysnaa dulmiga reer hebel iyo ina hebel, mid kale oo ah isugu kaalmayn iyo isugu gargaarid horukicin, wax tacbasho iyo Naar Aakhiro iyo halaag adduun iska badbaadin.

6- Ha la faafiyo tacliinta Islaamiga ah iyo midda maadiga ahba.

7- Ha ku soo noqdeen dalka aqoonyahannadii iyo wax garadkii ka qaxay, oo ha abuureen tartanno dhaqaale iyo wax barasho si ay ugu meelaysmaan halkii tartanka xukun doon.

8- Ha midoobeen dhaq dhaqaaqyada Islaamku, maadaama aysan isku khilaafsanayn wax asal diin ah ee ay isku afjigayaan arimo furuuc hoose ah, oo kala tagoodu yahay (Ikhtilaafu Tanawuc), ayna aad uga

fog yihiin (Ikhtilaafu Tadhaad), ugu yaraana ha wada shaqeeyeen guud ahaanba wadadada diintu iyaga oo ka soo wada go'aya qabiilladooda iyo hunguriga., oo ku wada walaaloobaya dar Alle iyo diinta u gargaarideeda.

9- Ha laga masaxo qalbiga dadweynaha daxalka iyo urugada qabqablayaasha dagaalka.

10- Ha laga soo jeediyo dadweynaha Kaaba qabiillada, Suldaanada, Ugaasyada, Boqorada, Wabaryada, Malaakhyada, Sayidyada, Imaaanada, Islaanada, iwm.

taasna macneheedu wuxuu yahay; way ku mahadsan yihiin intay oday qabiileedyadaasi bulshada soo dhaqayeen, nasiib darrase maanta xilkoodii wey la kufeen, ceebna kuma ahan taasi waayo waxaa is

baddelay samankii oo hawlahani ma ahan kuwii ay yiqiineene looga dambeeyey, ee waa dawladnimo iyo in lagu shiro dayaxa korkiisa halkii geed hoostiis bacaadka lagu saldhaysan jiray. Sidaa awgeed ha ku soo wareejiyeen xilka dhallinta curdoon ee ku hagi karta ummaaddaan tubta ay waalkood ku socdaan iyo tan ay ku badbaadayaan Adduun iyo Aakhaba.

11- Ha la soo celiyo, hana la hormariyo is dhex galkii bulshada sida; kala guurigii iyo xididnimadii, ganacsi is dhaafsigii, is magan gelintii iyo is badbaadintii, isu xeraysigii, iyo guud ahaanba is bahaysiyadii kale ee ku dhisnaa samafalka ama isku danaysiga iyo kheyr isku kaalmaysiga iyo guud ahaanba wixii kale ee soo celin kara wada noolaansho iyo horumarin arimo bulsho.

12- Ha iska dhiseen gobol walba iyo qola walba dhexdooda dawlad yar oo aan go'in (Precinct) iyaga oo si dimoqraadi ah isaga soo dhex dooranaya kuwa u qalma in ay maamulaan.

13- Ha u wada qaybsadeen si caddaalad korjoogto leh maamulka qabiillada kala duwan ee hal gobol isla degani.

14- Ha la isugu yimaado shirweyne dhexe oo loo dhan yahay, ayna ka soo qayb galaan ilaalo shisheeye oo lagu kalsoon yahay la islana wada doortay.

15- Ha la dhiso guddi wadaag ah oo masala dawlad dhexe oo loo dhan yahay, kuwaas oo u wada shaqeeya sidii dawlad rasmi ah oo dhisan.

16- Ha iska soo dhex doorteen gudoomiye guud oo masala booskii madaxweyne, kaas oo aan marnaba gaari karin wax go'aan ah keligiis.

17- Ha dhisteen gudigaasi Dastuur iyo nidaam u gooni ah oo waafaqsan sidii ay isku af gartaan iyagu dhexdooda.

18- Ha loo daayo gobol walba maamulkiisa iyo hawlihiisa, oo ha isku xukunto qola walba sharciga iyo nidaamka ay doonto, goboladii doonaana ha midoobeen.

19- Ha la kala goboleeyo hay'adahii dawladeed ee xarunta keliya lahaa, kala ahana sida; Poliska, Waxbarashada, War faafinta, Garsoorka, Arimaha bulshada, Arimaha diinta, Arimaha gudaha,

Shaqaalaha, Wershadaha, Ganacsiga, Dhaqaalaha, Malliyadda iyo guud ahaanba inta caynkaas ku socon karta.

20- Ha la hanti gaareeyo (Privatization) dhammaanba hay'adahii dawliga ahaa sida; Poliska, Waxbarashada, Warfaafinta, Caafimaadka, Wax soo saarka, Biyaha, Dabka, Gaadiidka, iyo guud ahaanba wixii la mid ah.

21- Ha ka shaqeeyaan guddiga dhexe wixii la xiriira hanti isu celin, dib u dejin, iyo dib isugu soo celin dadkii kala baytamaalay, dhidibadana ha u aaseen rajo dawladnimo oo xidideedu qotomaan, jirideeduna xajmi culus leedahay, laameheeduna sal iyo baar bexeen, sidaa oo kale ha askumaan cilaaqaad dawli ah.

22- Ha soo dhiseen guddigaasi xubnihii dawladda dhexe iyo hay'adeheeda masali lahaa, oo ka kala yimaada gobolada, laguna soo wada doorto hab ku dhisan maxaad taqaan iyo maxaad tari kartaa ee aan ku dhisnayn saami qabiileed oo keliya, hana ku kala shaandheeyaan tartan lagu qiimaynayo wax qabadkooda ka dib markii ay hawlgalaan, iyada oo qola walba indhaha loo saarayo dhaliilaha kii ay ceelka keensadeen.

23- Ha ka qayb qaateen guud ahaanba dhismahaas iyo tabaabushahaas dawladeed dhammaanba Aqoonyahannadu, Culima'u diinku (aqoonyahanka diinta Islaamka), Waayo araggu (qurbaawiga khibradaystay), Ganacsatadu, Xoogsatadu, iyo kulliba wax garadka ummadduu. Iyada oo qof walba uu ka qaadanayo hawsha halka ay uga soo aaddoo ee ay

tabartiisa iyo aqoontiisu dhigto, aanana u hanqal taagayn ama ku doodayn wax uusan cilmi u lahayn ee u daynaya kan u ehelka ah.

24- Ha u madax banaanaado gobol walba horumarinta iyo meel marinta dadkiisa iyo goofkiisa, oo dhammaanba mashaariicda horumarineed waxay ku xirnaanayaan hadba sida dadka deegaankaasi ugu dadaalaan horumarintooda, waxaana u fasaxan in ay xiriir iyo heshiisyo la galaan ciddii ay doonaan mar hadduunan xiriirkaasi wax u dhimayn masaalixda guud iyo mid gobol kale toona, sida; kuwa dumiya diinta iyo sharfka guud.

25- Ha la dhiiri geliyo iskaashatooyin isugu dhafan qabiillo kala duwan oo xiriirro la yeesha iskaashatooyin ajnabi ah, hawshooduna ha gaarto

heer caalami ah, iskaashatooyinkaasina ha ahaadeen nooc walba oo hawlaha aadanuhu galaan sida; kuwa ganacsi, kuwa wax soo saar, kuwa dhismo, kuwa wax barasho, kuwa fikir, kuwa dhaqan, kuwa diin faafin, kuwa cayaartooy, kuwa abwaanno iyo hal abuurro ah, iyo wixii kale ee aan mucaaradayn hiddaha Islaamka.

26- Ha abuureen guud ahaanba mas'uuliyiinta iyo wax garadku kaadirro u bisil la qabsiga habsami u socodka dunida, iyo jiilal hanta hawlaha mustaqbalka oo loo carbiyey siday u xamili lahaayeen hawshooda.

27- Ha soo dhiseen guddigu waax u xil saaran qiimaynta iyo daba galka (monitoring and evaluation) habsami u socodka guud ahaanba shaqada waddanka ka socota , kuwaas oo guud ahaan isla jira gaar

ahaanna u kala jira gobol gobol. hadhowna kala raaca hay'adaha dawladda.

28- Ha sameeyeen guddiga dhexe ee dawladda masalayaa ila dhaqaale iyo wax soo saar oo hadhow noqda hanti qaran, taas oo aan ahayn mashaariic nafci ah, ee ah diyaarin mustaqbal.

29- Ha ku shaqeeyaan dhammaanba xubnaha ma'uuliyiinta ihi iskaa wax uqabso iyo nafhurudnimo, oo mid walbaa ha iska biilo jeebkiisa.

30- Ha la sameeyo guddi xisaabi xil ma leh, oo daba gala hanti dhawrka, iyo hawl wadeenadaba.

31- Ha la ogeysiiyo guud ahaanba shacabka rayidka ah wax kaste oo dalka soo wajiha iyo wixii soo galaba.

32- Ha la abuuro laan ay dadweynuhu ku dhiibtaan ra'yigooda, taas oo kala munaaqashoota ruux walba fikraddiisa.

33- Ha la abuuro golayaal fikirka iyo fiirooyinka lagu kala qaato oo madax banaan, lana dhiirri geliyo.

34- Ha la abuuro ilo qoondayn oo dhaqso loo quud darreeyo.

35- Ha la cusboonaysiiyo, dabadeedna ha lagu mideeyo meel ka gedisan tan iyo heerka ay maanta joogaan Dabeecadaha dadweynuhu.

36- Ha la faafiyo qodobo cusub oo looga hadlo maalinle ahaan.

37- Ha la is daba taxo Mashaariic mustaqbaleed oo hufan.

38- Ha la tix geliyo, oo ha la daraaseeyo Taariikhda macallinka ah.

39- Ha lagu ol-oleeyo galab iyo subax sidii looga guuri lahaa raas nololeedka aan subax walba ku soo waabariisanno ama aan ku cabbaar furanno.

40- Ha loo ogolaado gobolkii doona go'itaan iyada oo shardi lagaga dhigayo in uusan weerar soo qaadayn, in uusan dhul dheeri ah qaadanayn, in uusan dacaayad colaadeed abuurayn, in uusan cuuryaamin dhaqaale

iwm abuurayn, in uu ogolaanayo xiriir saaxiibtinimo iyo walaaltinimo oo uu la lahaanayo guud ahaanba goboladii uu ka go'ay, oo uu kula noolaanayo derisnimo iyo wax wada qabsi.

41-- Ha laga samro aslanba gobollada maqan u doodistooda.

42-- Ha laga caago dagaal shisheeye iyo mid sokeeyaba, oo ha la taagto callan nabadeed.

43-- Ha laga dhigo dadka hubka, taas oo macneheedu yahay yaan ninna hantidiisa (qorigiisa) lagu qabsan laguna handadin ee maskaxdiisa ha laga baddelo oo ha loo geliyo maskax aan hubaysnayn.

44- Ha ka heshiiyaan guddigu halkii xarun u noqon lahayd fadhigooda iyo dawladda mustaqbalkaba, iyada oo laga taxa darayo hurgun fidno oo dambe oo ka yimaada eelka dhul sheegasho iyo goof is xijisiin.

45- Ha u gogol xaareen guddigaasi midnimo Soomaaliyeed oo aan ku salaysnayn hab reer baadiyood iyo reer guuraanimo ee ah mid la haysata nolosha casriga ah, ee ay adag tahay si aannu utiigsanno fogaanta ay naga fog tahay awgeed, marka ugu horaysa ee la xaqiijiyo in ay dadweynuhu taas u bislaadeenna, ha loo ol-oleeyo tallaabada xigta.

46- Ha qaban qaabiyeen guddiga iyo guddomiyahoodu doorasho caam ah oo ku salaysan dimoqraadiyad dhab ah (caddaaladda Islaamka), iyada oo la soo doorte kaste lagu xirayo shuruudaha

aan horay u soo xusnay ee loogaga baahan yahay ku kaste oo mas'uul ka noqonaya shacab Muslimiin ah.

47-- Ha la joojiyo kaalmada shisheeye, kol haddaynan ahayn mashaariic horumarineed si ay dadku u gartaan wax soo saar iyo harjad.

48- Ha weydiisteen guddiga dhexe hanti yar oo hawl fulineed shirkadaha iyo hantiileyda ladan ka dib marka ay wax soo saarkooda soo ban dhigaan oo kobcaan.

49- Ha la furo guriga tartanka dhaqaalaha, ama isugu faanka maalka iyo awlaadda.

50- Ha la furo guriga tartanka Qur'aanka iyo cilmiga Islaamiga ah.

51- Ha la dhiiri geliyo guurka iyo awlaad korinta iyo tarbiyeyntooda.

52- Ha xisaabtamo qof kaste oo hadana xisaabtankiisa ha u sii gudbiyo qoladiisa iyo kooxdiisa, iyaga oo kuwada xisaabtamaya kana tashanaya, maxay danteenna shakhsi ahaaneed inoogu jirtaa? tusaale; Haddii aan dagaalka joojiyo dagaal la'aanta ma ku heli karaa intii aan dagaalka ku heli jiray hadday tahay magac iyo hadday tahay maalba.

53- Ha lahaadeen shirar joogto ah oo qiyaastii maalin dhaaf ah, guud ahaanba guddiyada; talo go'aaminta, hawl fulinta, daba galka, qiimaynta iyo isku xirka.

54-- Ha la xaqiijiyo in aan madaxweyne dal xukumin ee uu shacabku is xukumo, isla markaasna uusan madaxweyne hormarin karin qaran kol haddaynan iyagu is horumarinaynin.

55- Ha laga dhawro awoodda in ay cid gooni ah ama shakhsi gooni ah faraha u gasho, oo ku kaste oo talo loo dhiibtaa ha ku ekaado hawl fuliye isku agaasima dadka iyo talooyinkooda.

56- Ha la kala saxiixdo mar walba heshiisyo qoraallo iyo markhaatiyo leh (contracts) oo haddii la jebiyo la qaadi karo tallaabooyin jebiyahaas isna lagu jebinayo.

57- Ha ku wareejiyaan guddigii soo halgamay xilka dawladda la soo doorto, dawladdaasina marnaba ma noqon doonto mid awood ku dhisan, sida aysan u

yeelan karin awood sharci dejin oo ay u madax banaan yihiin, iyo sida aysanba u gaari karin go'aan kelitalisnimo.

58- Ha garawsado ruux walbaa in uu Insaan qaldami kara yahay, Eebbana uusan gar daraysanaynin ee uu falkiisa ku abaal marinayo.

59- Ha ku deg dago ruux walbaa Tawbad dhab ah oo ku dheehan khushuuc iyo Eebbe isu dullayn.

60- Ha bilaabo ruux walbaa in uu ka guurayo falalkiisii qaldanaa ee uu dareemay, hana saaro cagta toobiyaha toosan ee ay ku hagaagayaan shuquladiisa oo idili.

Si uusan dhaqaaqaasi u noqon dhalanteed iyo dhaan daba gaalle, waxaa lama huraan noqonaya in la helo kaadiro daacad ah oo u bisil hawsha una haya nafhurid iyo niyad bir ah oo loola jeedo Alle dartiis.

Haddiise sidaa loogaga dhabayn waayo waxaa dhab ahaan u dhacaysa in arintu isugu soo biya shubato qaraw iyo dheelalow run la mooday, sow ma aragtid in qarawgeenuba uu huradada noogu soo ban dhigo qaar ka mid ah faylalkii badnaa ee ku dhex cakirnaa caloosheena, ee kolkaa uu inoo kala falanqeeyo isaga oo noogu kala qaadaan dhigaya ama hab rajo iyo raaxo ama haba tiiraanyo iyo wel-wel.

Taas oo aan ugu dambaysta ku dhamayno soo toos iyo gacmo maran, oo aan inoo kordhin wax aan ahayn fikir iyo ruwaayad been ah oo hor leh, taas oo naga sii

lumisa waqti iyo maskax. Sidaa waxaa ku masal noqon kara heshiis beenaadyada ay maanta in badan dadka dunidu isku maaweeliyaan iyaga oo isku qancinaya in ay qolo ku majixaabinayaan iyo in ay qolo qoor qabad ku xukumayaan.

Tan ugu weyn ee loo baahan yahayna waxa ay tahay in la helo bal wax Mabda' ah oo lagu kalsoon yahay, laguna heshiiyo ama ha la iskula jiro ama ha lagu kala jiree, ka dibna la isku ixtiraamo oo qola walba goonideeda u dabra.

Waxaa kale oo iyana loo baahanayaa in la helo nafhurid, is daahirin iyo dib isu cusboonaysiin, taas oo ah in mar labaad la dhasho oo macneheedu yahay in weji cusub lala yimaado dunida.

Waxaa kale oo walaalayaalow lama huraan ah in marka la baadi goobayo xalka Il qota dheer lagu eego waxyaalaha la kala shinsanayo ee uu qof walbaaba ku tabanayo xaq ka maqan,

Tusaale ahaan marka aan taa ku sii bal ballaarino waxa aan soo qaadan karnaa mid ka mid ah cilladihii ay isku af garan waayeen balse ay marnaba isugu imaan waayeen kuwii iyaga oo hal qabiil ah goonida iskula baxay isku dayey in ay dawlad gooni ah noqdaan ee reer Soomaaliland.

Taasina waxay ahayd ka dib markii lagu dhawaaqay dawladnimo madax banaan ayaa waxaa dibadaha ka soo yaacay dhallin yaro u wada hanqal taagaysa xukun, ha u lahaadeen aqoon ama yeysan u lahaane. Hase ahaatee taasi waxa ay mari weyday raggii

dhawrka sano kaymaha kju asqaysnaa ee quudan jiray dambaaburada rasaasta, ka dibna waxaa caan baxday halku dhegga ah: (Ina adeer tan anaa Kaadida u soo cabbay).

Waxayna kuwii in ay wax maamulaan doonayey u kala bexeen dhawr kooxood oo ku dhisan hab iyo goob dhaqameed ay ku kala jiraan labadii isku uurka seexatay, waxaana ka mid ahaa kooxahaas:

1- Maana Casiir, oo ah kuwii ka soo shaqaystay Khaliijka Carbeed ee doonayey in ay lacagtooda ku dalbaan talis.

2-Maana Faysto, oo ah odayaashii ku hawlanaa kala findhicilintii fidnooyinkii ka aloosnaa Koonfurta, iyo kufintii dawladdii Barre iyaga oo saynta ku sii wata MaanaFaystadoodii kale ee Xamar laga cayrshay.

3- Maana-Quusato, oo ah kuwii ka qab qablayn jiray dawladdii hore ee Barre, ka dibna ku soo daahay Xamar iyaga oo ka rajo qabay dawlad dambe oo la isugu yimaado, ayna hor boodaan mar kale.

4- Maana-Qaaxo, oo ah kuwii u soo dagaallamay ee jid iyo jaf kaste u soo galay iyaga oo naftooda u hurayey sidii ay dawlad Beeleed ku heli lahaayeen.

TUSMADA BUUGGA

==========

Casharka

Bogga:

Cutubka Koowaad.

HORTA YAA DUNIDA FASAHAADIYA?

1- Dadkaa Dunida Fasahaadiya.

2- Danaanada.

3-- Dabar goynta Danaanada.

4-- Qur'aan iyo Xadhith Qalad laga Fahmay.

Cutubka Labaad;

QABYAALADDA.

1-- Qabiil Qalad laga fahmay.

2-- Fasahaadka Qabyaaladda

3-- Qabyaaladda waa laga Digay.

4-- Siday ku dhamaatay Qabyaaladdii Carbeed.

- Cutubka Saddexaad.

MAXAA NALOO CADAABAYAA?

1- Waa maxay Cadaabku?

2- Fadaranimadeenii.

3- Cibaado qalloocinta.

4- Fool xumooyinkii Kharaaraa ee Waayadii Dagaalka.

5- Maxaan la dareemi weynay Cadaabka?

Cutubka Afraad:

AAYADAHA CIBRA QAADASHADA

EE LAGU SHEEGAY QUR'AANKA.

1- Suuradda Huud.

2- Qubane Suurado kale ah.

3- Suuradda Al-acraaf.

4- Geban gabo.

5- Miyaan is shabahnaa inaga iyo Yuhuudi?

6- Qoladee naga macangagsan.

Telegram @Somalilibrary

7- SIDAY ANIGA ILA TAHAY – GEBAN GABO.

8- TUSMADA BUUGGA.



Somali Library

Buugaan iyo Buugaag kale ee ku qoran Luqadaada Hooyo ee Af-Soomaaliga waxaad ka heleysaa Somali Library

Fadlan Booqo Boga Telegram-ka

https://t.me/Somalilibrary

liibaanwaasuge